PUNTLAND MINISTRY OF EDUCATION (MOE)

# BARE-KAABE

## FUDUDAYNTA
## WACYIGELINTA MADANIGA AH
## EE NABADDA, AMNIGA, DIB-U-HESHIISIINTA, DIMUQRAADIYADDA IYO MAAMUL WANAAGGA

**Garowe, Puntland/Somalia**

interpeace

PDRC
PUNTLAND DEVELOPMENT
RESEARCH CENTER

# Xusid iyo Mahadnaq

**Kaabe-Bare – Fududayaha Wacyigelinta Madaniga ah ee Arrimaha Nabadda, Amniga Dimuqradiyadda iyo Maamul-wanaaga:**

| | |
|---|---|
| Cilmi-baarayaasha | Xassan Aadan Maxamed |
| | Axmed Cusman Aadan |
| | Daahir Maxamed Ismaciil |
| | Cabdinasir Maxamed Yusuf |
| Sawirrada | Mukhtaar Mahamed Xirsi |
| Suugaanta | Ahmed Shiekh Jama |
| Xiriirinta Cilmibaarisata | Cali Farax Cali |
| Lafa-gurka | Cabduraxman Cabdulle Cusman (Shuke) |
| Isku-dubbaridka | Jessamy Garver-Affeldt, Anne Moltes |
| Khibradda Waxbarashada | Elizabeth McDonnell (Nuqulka Ingiriisiga ah) |
| Naqshadda | Cege Mwangi /Gecko Media |

Kaabe-Barehani ma suurto galeen haddii aaney wax-ku-biirintii iyo ansixiintiisa aaney ka qaybqaadan macallimiinta dugsiyada sare iyo hawlwadeennada Wasaaradda Waxbarashada Puntland oo liiskoodu ku lifaaqan yahay buugga dhammaadkiisa (eeg lifaaqa 6).

**Afeef: Buuggan soo saaristiisa waxa iska kaashaday Interpeace iyo Xarunta Horumarinta Cilmibaarista wuxuna ka tarjumayaa oo keliya aragtidooda. Sidoo kalena aragtidaas ma aysan ansixin mana oggoolaan deeq-bixiyeyaasha gacanta ka geystey, sidaas darteed deeq-bixiyeyaashy mas'uul kama aha sugnaanshaha xogta ku jirta buuggan.**

interpeace

Interpeace Regional Office
for Eastern and Central Africa
P.O.Box 14520 00800
Nairobi, Kenya
T: +254 (0) 20 265 5228
M: +254 (0) 733 605 290;
+254 (0) 710 607 373
www.interpeace.org

PDRC
PUNTLAND DEVELOPMENT RESEARCH CENTER

Garowe, Puntland
Phone: (+252 5) 84 4480
Galkayo Satellite Office
Phone: (+252 5) 85 4200
Emails: Shukeosman@gmail.com
alialifarah@gmail.com
muufo@gmail.com
www.pdrcsomalia.org

Printing: Puntland Ministry of Education, Garowe, Puntland/Somalia

# Contents


Arar ..... 5
Hordhac ..... 6
Xaaladda Guud ..... 6
Bare-Kaabaha ..... 7
Kaalinta Fududayaha ..... 8
Cutubka 1aad: Fududaynta ..... 9
Koox-hawleedka iyo Fududaynta ..... 9
Kooxaha iyo Hawl-Koxeedka (Groups and groupwork) ..... 9
Dood, Wadahadal ama Wadaxaajood? ..... 11
Aflaamtu waxay dhiirrigeliyaan wadahadalaka ..... 12
Qorshaynta Kulanka – Ka Hor, Inta kulanku Socoto iyo ka Dib ..... 13
Kulanka Ka Hor – Qorshaynta ..... 13
Marka kulanka lagu Gudajiro – Abuurista Madal ku habboon in wadahadal iyo wadatashi lagu qabto ..... 16
Ku Kaabidda Doodda Su'aalo ku habboon ..... 19
Maaraynta Caadifadda iyo Khilaafka Kooxda Dhexdeeda ..... 21
Is-dhegaysiga ..... 23
Isdhegaysiga lamaanka (Paired Listening) ..... 23
Fiiro gaar ah ..... 24
Gunnaanadka/Qiimaynta Kulanka ..... 24
Tixraac ..... 25
Cutubka 2: Nabadda, Dib-U-Heshiisiinta Iyo Amniga ..... 26
Hordhac ..... 26
Sida loo Adeegsanayo Cutubkan ..... 27
Khilaafka ..... 28
Qeexitaanka Khilaafka ..... 28
Astaamaha Khilaafka ..... 29
Nabadda ..... 29
Nabadaynta (Peacebuilding) ..... 29
Aragtida Islaamka ee Nabadaynta ..... 30
Dib-u-heshiisiin ..... 34
Qeexitaanka Amniga Qaranka ..... 35
Amniga Bulshada ..... 35
U-hoggaansanka Sharciga Dimuqraadiyada ku Dhisan ..... 35
Aragtiga Amni ee Puntland ..... 36
Su'aalaha Wadahadalka, Hawlaha iyo Filimada ..... 36
Su'aalaha wada-hadalka ..... 36
Hawlaha ..... 36

Hawl: Sawir ay tahay in la dheegto lagana wadahadlo ........ 38
Hawl: Maahmaahyo iyo gabayo ku saabsan nabadda........ 38
Nabadda ........ 39
Filimo........ 39
Cutubka 3: Dimuqraaddiyadda iyo Maamul-Baahinta ........ 45
Dimuqraaddiyadda ........ 45
Sida loo Adeegsanayo Cutubkan ........ 45
Dimuqraaddiyadda ........ 46
Waa maxay dimuqraadiyadi ........ 46
Dawlad & Xukuumad ........ 48
Hawlaha Axsaabta Siyaasadeed iyo Kaalinta ay kaga jiraan Dimuqraaddiyadda ........ 49
Waa maxay doorasho? ........ 50
Baarlamaanka ........ 50
Habka Qabiilka iyo Kan Dimuqraaddiga ........ 51
Xaaladda Puntland iyo Dimuqraadiyaynta ........ 52
Maamulka Maxaliga ah (Local Governance) ........ 53
Maamul-baahin ........ 53
Maamul-Dawladeed ........ 54
Maamul-Baahinta Iyo Dawladaha Hoose ........ 55
Su'aalaha Laga Wada Hadlayo, Hawsha iyo Filimada ........ 57
Su'aalaha Wada-hadalka ........ 57
Hawl/Shaqo ........ 58
Sawir laga wada-hadalayo ........ 60
Shaqada: Doodda ku saabsan Maah-maahaha iyo Gabayga la xiriira nabadda ........ 63
Filimada ........ 66

Lifaaq 1: Qorshaynta Kulanka: Waxyaabaha loo baahan yahay in la tixgeliyo si kulanka loo qorshayo ........ 70
Lifaaq 2: Tusaalaha foomka xog-ururinta inta aan kulanka la furin ........ 74
Lifaaq 3: baraarujinta ........ 75
Lifaaq 4: In luqadda canaanta dusha looga tuuro ........ 76
Lifaaq 5: Foomka Qiimaynta ........ 77
Lifaaq 6: Liiska macallimiintii ka qaybgashaya Shikii wada-yashi iyo ansixinta buugga........ 78
Lifaaq 7: Akhris Dheeraad ah ........ 79

# Arar

Buuggan waxa qoristiisa iyo habayntiisa iska kaashaday Xarunta Horumarinta Cilmi-baarista Puntland (PDRC), hay'adda ay bah-wadaagta yihiin ee Interpeace iyo Wasaaradda Waxbarashada Puntland. Buuggu wuxu qayb ka yahay mashruuc ay maalgelisey Midowga Yurub kuna saabsanaa hawlo cilmi-baaris ay hirgelisey Kooxda Maqal-muuqaalka Guur-Guurta ee PDRC/XHCP. Barnaamijka waxa deeq maaliyadeed oo dheeraad ah ku biiriyey hay'adaha iyo Dawladaha kala ah Norway, Switzerland, Sweden, DFID, Danida iyo USAID. Mashruucu wuxu diiradda sarayey Ardayda dugsiyada sare iyo dhalinyarada guud ahaan.

Iyada oo la adeegsanyo soo bandhigidda aflaam dukumentari ah ka dibna ay ardayda iyo dhallinyaradu ka doodaan iyaga oo nuxurka iyo farriimaha uu filimku xambbaarsan yahay falanqanaya ay isla markaas aqoontooda iyo xaaladaha la xiriira waxbarashada, dimuqraadiyadda, dhallinyarada iyo haweenka, la dagaalanka burcad-badeedda ay ku kororsanayaan.

Buuggani wuxu ku suurto galay adeegsiga habka cilmi-baarista laga wada qaybgalay oo dhammaan inta uu khusayso, sida Wasaaradda Waxbarshada, Ardayda dugsiyada Sare, Macallimiinta, Ururada Bulshada iyo Dhallinyarada guud ahaan, ay ka qaybgaleen doodihii iyo falanqayntii ay u abaabuleen cilmi-baarayaasha iyo hawlwadeennada hay'adaha PDRC iyo Interpeace.

Buuggan iyo nuxurka uu xambaarsan yahay waxa lagu ansixiyey shir wada-tashi oo ay ka qaybgaleen ilaa 30 xubnood oo ka tirsan macallimiinta dugsiyada sare iyo hawlwadeennada Wasaaradda Waxbarashada Puntland. Shirkaas wada-tashi oo lagu lafaguray dhammaan qaybaha uu ka kooban yahay, waxa kale oo la isku raacay magaca uu qaadanayo oo ah "BARE-KAABE," oo ka tarjumeysa waxtarka uu u yeelanyo macallinka. Inkasta oo aan si kama dambays ah loo soo bandhigin, waxa haddana la isla waafaqay istratejiyada lagu fulinayo taas oo ay hormood ka noqon doonaan macallimiinta maadooyinka cilmiga bulshada ee dugsiyada sare.

Daabacaaddani waa tii ugu horraysey. Waxa la filaya in uu buuggani noqdo mid taabo gal ah bilow fiicanna u noqda curinta daabacaado ka sii mug weyn ayna saldhig u tahay khibradda iyo waayoaragnimada laga helo cidda adeegsata.

# Hordhac

Buuggani waa Kaabe-Bare macllimiinta dugsiyada sare ka taageera hawlaha fududaynta. Wuxu u iftiiminaya habka iyo aaladaha ay ku wajahayaan sidii ay da'yarta ugu fududayn lahaayeen arrimaha la xirriira nabadda, amniga iyo dimuqraadiyadda, iyo in ay u abuuraan fursado ay si wax-ku-ool ah uga doodaan ammuurahaas. Aflaaam dukumentari ah ayaa qayb muhiim ah ka qaadanaya bilawga ka hadalka xaaladaha jira.

Kaabe barahan waxa looga dan leeyahay:

- In uu ka taageero macallimiinta sidii ay u fududayn lahaayeen dood ku qotoma aflaam dukumentari ah oo la soo bandhigo
- Inuu u sahlo macalliimiinta sidii ay u heli lahaayeen khibradaha wax lagu fududayo ayna mustaqbalka awood ay ku adeegsadaan u helliahaayeen.

Macallimiintu kaalin mug leh ayeey ka qaataan sidii ay u taakulayn lahaayeen waxbarashada da'yarta ayna u kobcin lahaayeen garaadkooda iyo qiimaynta ay ku samaynayaan maaraynta khilaafaadka, nabadda, dib-u-heshiisinta iyo dimuqraadiyadda. Sido kale, wada-tashiga iyo doodaha la wadaago waxay kaalin muhiim ah ka qaataan is-dhaafsiga xogta iyo in ay ka-qayb-galayaasha siiyaan wakhti iyo madal ay kula wadaagaan saaxiibadood ka doodista khibradaha ay kasbadeen, ayna ku ogaadaan fikradaha iyo hab-dhaqanka kuwa kale. Taasi, isla markaas, waxay keeneysaa in la isla ogaado fikradaha kala duwan iyo in ugu dambaysta la isla helo tab lagu maarayo caqabadaha ka dhallan kara kala duwanaanshahaasi. Guud ahaan doodaha waa in la maareeya si aan loo cabburin codadka inta laga tiro badan yahay ama gabran ee bulshada qaybeheeda kala duwan ka mid ah.

## Xaaladda Guud

Somalia waxay ka soo doogeysaa (ka soo kabaneysaa) in ka badan labaatan sano oo ay burbur iyo colaad sokeeye ku jirtey. Muddadaas jahawareeerka iyo qalalaasuhu ka jirey ma burburin oo keliya kaabayaashii dhaqaalaha, balse hab-dhaqankii bulshaduna waa kala daatay. Nidaamkii waxbarashadu wuxu la dumey burburkii qaranaka ee sannadkii 1991. Sidaas darteed waxa bulaan-buley hab-dhaqan colaadeed oo bulshada ka tirtiray dhammaan qiyyamkii waddaniyadeed. Taasi waxay saamayn weeyn ku yeelata bulshada guud ahaan, gaar ahaanna dhallinyarada. sida ku xusan qoraalka sannadlaha ah ee 2012,[1] oo Hay'adda Qaramada Midoobey u qaabilsan Horumarinta ee UNDP, dhallinyarada da'doodu ka hoosayso 30 sano wax aka yihiin dadweynaha 70%. Boqolkiiba 67 ka mid ahi ma helaan fursado waxbarasho iyo mid shaqo toona.

In dib-u-dhisid lagu sameeyo kaabayaasha dal burburay, kaas oo ka soo kabanaya saamayntii uu ku yeeshay dagaalkii sokeeye iyo dawlad la'aantii, waxa ka dhib

[1] Somalia Human Development Report 2012 – http://www.so.undp.org/shdr/Somalia%20Human%20Development%20Report%202012.pdf

badan ama ka culus in dib loo soo celiyo xirriirkii bulsho ee burburay iyo dib u soo buuxinta khayraadkii aadami ahaa oo ka kala firdhaday. Dib-u-dhiska xirriiradu waxay u baahan yihiin in la soo celiyo kalsoonidii ka dhexaysey bulshada iyo in ay bulshadaas ka go'an tahay in ay is xushmayso si kastaba ha ahaadeen khilaafaadka ka dhex jiraa iyo sooyaalkooda xannuunka badaniba. Hase ahaate arrintaasi waxay u baahan tahay wakhti dheeraad ah, shaqo iyo rajo laga muujiyo mustaqbalka. Haddii aan la helin dib-u-habayntaas xirriirada dadka ka dhexeeya waa suurto gal in nabad kasta oo la hirgeliyaa aysan waarin ee khatarta colaaddu dib u soo cusboonaato (War-torn Societies Project 2005).[2]

Sannadkii 1999, hay'adda Interpeace (oo markaas loo yiqiin Mashruuca Bulshooyinka ay Dagaallada Sokeeye Aafayeen ama War-torn Societies Project, WSP) waxay ka bilowday barnaamijkeedi ay Somalia dhibaatadeeda wax kaga qabaneysey Hab cusub oo ay u adeesatey aaladda Maqa-Muuqaalka kaas oo gacan weyn ka geystey isu soo jiidista xiriirradii bulshada iyada oo muhimmad gaar ah la siinayo dhallinyarada. Haddaba, iyada oo adeegsaneysa Habka Cilimi-baarista laga Wada Qayb-qaato (Participatory Action Research),[3] Interpeace waxay gacan ka geeysatey asaasidda Xarunta Horumarinta Cilmi-baarista Puntland (PDRC) ayna ilaa haatan la garab taagan tahay kaalmo dhaqaale iyo dhismaha awoodeheeda wax-qabad. PDRC waxay asaastay koox u qaabilsan maqal-muuqaalka oo soo saarta aflaam dukumentari ah kuwaas oo loo adeegsao faafinta cilmi-baarista, curinta doodaha la xiriira arrimaha khusaya nabadda iyo dhismaha dawladeed iyo weliba dhiirrigelinta ka qaybqaadashada bulshada ee ammuuraha maamul-wanaagga iyo horumarinta guud.

## Bare-Kaabaha

Aaladda maqal-muuqaalku waxay fududaysaa habka isu soo dabbaalidda dhallinyarada, siiba marka lagu dhafo dodaha iyo wada xaajoodyada, waxayna macallimiinta iyo ardaydaba ku dhiirigelisaa fahamka ama garashada arrimaha muhiimka ah ee laga wada xaajoonayo. Bare-Kaabahani wuxu macallinka u yahay aalad waxbarasho, wuxuuna siinaya awood uu ku fasiro arrimaha la xiriira nabadda, dimuqraadiyadda, amniga iyo maamulka maxalliga ah. Wuxu macallinka ka taageeraya habka fududaynta isaga oo tixgelinaya Habka Ka-qayb-galka laga wada qayb-qaato ee PDRC ku shaqayso. Macallimiintu waxay ardayda ku hagayaan in ay is-dhgeystaan iyo in ay ku barbaariyaan sidii ay u noqon lahaayeen dad xilkas ah oo leh qiyyam nabadeed iyo dimuqraadiyadeed. Hagiddu waxay keenta inay abuurmaan waddooyin

[2] Rebuilding Somalia: Issues and Opportunities for Puntland; June Kane, WSP/International, 2001, p 31, HAAN Associates, , ISBN 1 874 20904 9.

[3] Interpeace/PDRC's Participatory Action Research (PAR) methodology: waa hab cilmi-baaris oo ay labada hay'dood ku shaqyaan. Habkani wuxu kulmiyaa qaybaha kala duwan ee bulshada iyo maamullada kuwaas oo fursad ay ku falanqayaan arrin ka dhexaysa ka hela halkaas. Dood iyo falanqaynta ka dib waxa lagu heshiiyaa ama meel la isla dhiga wixi laga wadahadlayey. Waa hab dhammaan inta ay khusayso dhibaato in la xalliyo u baahan ama horumar in la gaaro u baahan ay ka wada qaybqaataan oo ay xal ama heshiis ku gaaraan.

ay ardaydu iskula falgalaan, ayna ku maarayaan isla fagalkooda iyo dareenkooda, iyada oo la adeegsanyo su'aalo ay ku daah-furayaan ammuuraha iyo wadaxaajoodyada dhex mara.

Bare-Kaabahani waa wax-soosaarka Kooxda Maqal-muuqaalka Guur-guurta ee PDRC (Mobile Audio-visual Unit -MAVU), taas oo ku salaysan barnaamij lagu soo bandhigo doodo iyo wadaxaajoodyo ku qotoma aflaam dokumentari ah oo fasallada ay ardaydu ku daawato. Waxa suurto gal ah in aan dhammaan dugsiyadu awood ay ku soo bandhigaa aysan wada lahayn, balse taasi kama hor istaageyso in ay doodaha fududayaan xittaa haddaaney aflaam adeegsan. Kaabe baraha waxa la adeegsan kara iyada oo la isticmaalayo macluumaadka waafiga ah ee ku qoran.

Bare-Kaabahan waxa loogu talo galay in ay adeegsadaan macallimiinta dugsiyada sare ee Puntland/Somalia iyada oo xiriirineysa wasaaradda waxbarashadu isla markaasna ay suurto gal tahay in ay ka qaybqaataan hirgelintoiisa ururada bulshada rayadka ahi.

## Kaalinta Fududayaha

Macallimiintu ma siinayaan ardayda cashar, balse waxay fududaynayaan dood, fikrado khuseeya mawduucyo khaas ah oo la isweydaarsanayo lana wadaagayo. Macallinku wuxu fududaynayaa aqoon ama waxbarasho.[4] Sideedaba macallinka fududeeyaha ah kaalintiisu waa in uu si caddaalad ah oo huffan u maamulo doodaha ardayda dhex mara, kuna hago in ay si isku mid ah wax u fahmaan waxa ay ka filayaanna uga soo baxo. Isaga oo adeegsanaya aaladaha iyo macluumaadka ku jira Bare-Kaabahan, macallinku wuxu xaqiijinaya in ay ardaydu ama dhallinyaradu fursad u helaan ay doodaan kuna falanqayaan mawadiicda hoos ku qoran.

***Mawduucyada:*** Kaabe Barahani wuxu koobaya mawaadiicda hoos ku qoran oo kala ah:

- NABADDA (PEACE)
- DIB-U-HESHIISIINTA (RECONCILIATION)
- AMNIGA (SECURITY)
- DIMUQRAADIYADDA (DEMOCRACY)
- MAAMULKA MAXALLIGA AH (LOCAL GOVERNANCE)

Qeexidda, fasiraadda iyo falanqaynta Dhammaan mawaadiicda kor ku xusan waxay ku faahfaahsan yihiin cutubyada buuggan. Waxaase in la xuso mudan ama maanka lagu hayo in aragtiyo kala duwan laga qabi karo mawaadiicdan fahamkooda. Cutubka 1aad ee buuggan ayaa iyana lagu faahfaahiyey fududaynta iyo aaladaha loo adeegsanyo.

---

[4] The Role of the Teacher in Small Groups Faculty Development, London Deanery ; (http://www.faculty.londondeanery.ac.uk/e-learning/small-group-teaching/the-role-of-the-teacher)

# Cutubka 1aad: Fududaynta

## Koox-hawleedka iyo Fududaynta

Qaybtan waxa lagu eegaya Kooxaha iyo baahida loo qabo fududaynta, kaalinta fududayaha, mabaadii'da guud ee assaska u ah fududaynta, aaladaha loo adeegsado fududaynta iyo qorshaynta kulammada doodda.

## Kooxaha iyo Hawl-Koxeedka (Groups and groupwork)

**Group Characteristics**

- Kooxi waxay ka koobantaa 2 qof iyo wixi ka badan. Waxay noqon karaan rasmi/joogto ama mid aan rasmi ahay. mid qaab-dhismeed leh ama mid aan habaysnayn.
- Tilmaamaha u gaarka ah waxa ka mid ah in xubnaha kooxdu isku xiran yihiin oo aaney kala madax bannaanayn. Waxa ka dhexaya xiriir bulsho.
- Xubnaha Kooxdu waxay badanaa wadaagaan hadaf ama yool ka dhexeeya, iyo in ay sidoo kale xubneheeda ay xaaladi ka dhexayso.
- Kooxuhu waa isku dhafan yihiin si joogto ah ayeeyna isu bed-beddelaan aragtiyohooda gaar-gaarka iyo kuwa guudba.

Sideedaba, dadku iyaga ayaa go'aansada in ay kulmaan oo samaystaan kooxo ay uga wada shaqayaan arrin ka dhexeeya si ay igu heshiiyaan xal ay isku waafaqsan yihiin. Sidaas awgeed, kooxuhu waxay ka abuurmi karaan qaar isku sooyaal ah, isku dhaqan ah, isku qiyyam ama diin ah amaba wax kale la wadaaga dadka kale. Kala duwanaanshahaas ayaa keena in ay ku kala duwanaadaan isla xiriirkooda iyo sida ay wax u baranayaan.[5]

### Maxaa Fududaye loogu Baahan yahay?

Kooxuhu way hawlgeli karaan iyagoon fududaye lahayn. Waxaase shardi u ah in inta badan ee kooxuhu ay leeyihiin khibrado iyo hab-dhaqan u sahla in ay xaqiijiyaan ka wada qaybgalka, oggolaadaan aragtiyaha kala duwan, xubin kasta codkeeda la maqlo ayna kooxuhu leeyihiin hab ay ku maarayaan wixi khilaaf ah oo ka dhex

[5] Howard Gardner developed the theory of multiple intelligences, http://www.multipleintelligencetheory.co.uk/index.aspx), in 1983, the 3 main ones being visual, auditory and kinaesthetic (VAK). Another approach was developed by Peter Honey and Alan Mumford (1986a) who identified four learning styles or preferences –theorist, activist, reflector and pragmatist. They suggested that most of us use one or two of these styles, and that different learning activities may be better suited to particular styles (Your Learning Style) (http://www.open.edu/openlearn/science-maths-technology/computing-and-ict/information-and-communication-technologies/living-the-internet-learning-online/content-section-1.2.1)

aloosma. Waxa suurto gal ah in mar kasta ay kala duwanaanshaha kooxuhu ay badatoba waxa badanaya habacsanaanta iyo wax-qabad la'aanta kooxaha, taasina ay sababto burbur ku dhaca doodaha iyo wadaxaajoodyada. Kooxdu haddii aysan nidaamsanayn waxa ka dhasha in aragtiyaha qaar ka mid ah doodu uu qaalib noqdo, xiisaha loo hayaana lumo ama qaar ka mid ah kooxdu ka baxaan madasha. Waxaabase ka sii daran marka ay taasi dhacdo in kooxdu qaybsanto halkaasna ay ku lunto go'aan ka gaarista arrintii iyo ujeedadii muhiimka ahaa oo ay kooxdu u abuurantay.

**U Fududaynta Kooxda**

- ➪ Fududayntu waa hab wax "lagu dhib-yaraynayo" sidoo kalena U Fududaynta Kooxdu waa hab lagu sahlayo in kooxdu si wada jir ah u wada shaqaynaan ama isla falgalaan.

- ➪ Fududayaha Kooxdu waa qof ay xubneheedu isla wada oggol yahay. Saamayn kuma yeesho aragtiyaha kala duwan, hadda go'aanna uma gaaro xubnaha kooxda. Wuxu maamulaa oo keliya habka ay kooxdu ku gaareyso yoolkeeda.

- ➪ Hab-kooxeedku waa in ay kooxdu ka wada shaqayso - sida ay u wada hadlayaan, dhibaatooyinka u wajahayaan, go'aamada u qaadanayaan ayna u maaraynayaan haddiiba uu khilaaf ka dhex-dhasho. Haddaba qofka fududayaha ahi waa in uu khibrad dheeraad ah u leeyahay ammuurahaas.

- ➪ Jaan-tusku waa waxa kooxdu ku hawlgeleyso. Kaasi wuxu noqon karaa dawo ama dareen la wadaago, ku heshiin qorshe hawgal ama curinta wax cusub. Jaan-tuska waxa iska leh kooxda iyagaana mas'uuliyaddeda qaadaya.

### Astaamaha lagu Yaqaan Fududaynta Naajaxa ah

Fududayuhu wuxu abuura jawi ay kooxdu diiradda ku saarto ammuuraha horyaal waana in uu dhammaantood xiriiriyo. Waxa muhiim ah:

- In ay u kala cad yihiin kaalintiisa iyo tan xubnaha kooxdu
- In uu awood u yeesho in uu kasbo kalsoonida iyo oggolaanshaha dhammaan xubnaha kooxda.
- In uu marka uu ku jiro hawl fududayenimo uu xakamayo aragtidiisa iyo dareenkiisa ee uu dib uga istaago aanuna ka dhexgelin dooda.
- In uu aad ugu feejignaado waxa ka dhacaya kooxda gudeheeda, isla markaasna hab-socodka doodda uu la socdo.

Fududayaha waa in ay kooxda dhammaanteed u aragtaa dhex-dhexaad t.a. sida in aanu u xaglin dhanka mid ka mid ah ama aragtida qaar ka mid ah uusan taageerin. Taasi waxay xubnaha ku dhiirigelineysaa in ay kalsooni ku qabaan in aragtidooda loo dhegtaagayo ayna tixgelin heleyso. Balse, taas micneheedu ma aha in fududayuhu aanu fir-fircoonaan. Balse waxaaba looga baan yahay in uu si kalsooniyi ku jirto u qorhseeyo una abaabulo madasha, u feejignaado isla falgalkooda si dhab ahna uga muuqdo kulanka. Fududayuhu marka uu aad ugu feejigan yahay ardayda ama dhallinyada isla falgalkooda wuxu awood u yeelanaya in uu si dhab ah ula socdo ammuraha soo if-baxa uuna durbadiiba u qaato go'aan uu ku soo faragelinayo si wax uga qabto xaaladda. Tusaale ahaan t.a. marka uu dareemo in mid ka mid ah kooxdu hadalka keligiis qaato, waa in uu soo dhexgalo oo isago tixgelinaya wixi uu sheegay qoka hadalka badani wuxuna weydiinaya kooxda[6] haddii ay jirto cid wax ku dareysa wixi uu sheegay ama jawaabtii uu bixiyey qofkii hadalka keligiis bursaday.

## Dood, Wadahadal ama Wadaxaajood?

Waxa halka lagu soo gudbinaya qeexidda mid walba uu gaarka iyo wax ay ku kala duwan yihiin erayada Dood, Wadahadal iyo Wadaxaajood.

**Dood - Wadahadal - Wadaxaajood**

Dood (Debate): waa tartan maskaxeed dhex mara laba qof ama kooxood oo aragtiyo kala duwan qaba si ay ugu qanciyaan dhegeysteyaal ay ka filayaan in ay ku kala saara sida fikradohoodu u kala fiican yihiin. Dooddu waxay leedahay xeerar loo adeegsado aqoonna lagu kala kororsado. Tartamayaashu waxay iska weeraraan fikradaha, balse iyagu isma weeraraan. Doodda waxa bi'iya meel-kaga-dhaca shakhsiyadda qofka.

Wadahadal (Discussion) waa hab ay 2 ama dad ka badani (2-15 qof) aragtiyo isku weydaarsadaan. Ujeeddadu waxay noqon kartaa mid rasmi ah ama ku-meel-gaar. Muhimmadu waa in la gaaro heshiis la isla oggol yahay ama la isku raacsan yahay ee arrin ama hab-socod. Wadahadalku wuxu isu rogi karaa Dood (debate) marka ka qaybgalayaashu luqado, heer aqoon ama dhaqan kala duwan leeyihin amaba wax kala jiidasho ay wadahadalka soo gasho oo markaas ay qayb waliba isku dadydo in ay qaybta kale ka guulaysato.

Wadaxaajodku (Dialogue) waa ka duwan yahay doodda iyo wadahadalkaba sababta oo ah ujeedadiisa quri waa in wax lagu ogaado ama lagu gooni-baaro afkaar la wadaago amaba lagu fahmo kala duwanaanshohooda. Waa fikrado isweydaarsi loo baahan yahay in ay ka-qaybgalayaashu si xushmad leh isu dhegeystaan iyaga oo aan is eedayn isla markaasna isu qalbi furan.

---

[6] Fikir-Kooxeedku waa halka ay hanaqaado ama hirgasho ra'yiga inta badani ayadoon si dhab ah looga baaraan degin caqabadaha. Waa halka ay ku cabbursamaan codadka mucaaradka iyo inta diidan maamulka.

Doodda, wadahadalka iyo wadaxaajoodku waxay ku kala duwan yihiin ujeeddooyinka, nooca iyo natiijada laga doonayo.

- Dooddu waxay leedahay laba waji oo iska soo horjeeda waxayna ku biyoshubataa xaalladda Guul-Guuldarro (win – lose). Xaaladdan cid ayaa guulaysata halka cid kalena guuldarro la kulanto.
- Wadahadalka waxa isaga ka qaybqaata dhinacyo kala duawan iyo aragtiyo badan. Waxay taasi horseedi kartaa in ay ku biyoshubato labada xaaladood ee Guul-Guuldarro (win – lose) amase Guul-Guul (Win- Win) oo lagu heshiiyo aragtida kooxi wadatey xittaa haddii ay kala duwanayeen. Waxay ku heshiin karaan in ay kala duwanaadaan.
- Wada-tashiga waxa badanaa ka qaynqaata dhawr qof ama dad badan oo ku kala duwan aragtiyo iyo waxa ay aaminsan yihiin, kuwaas oo midba midka kale aragtidiisa goonibaaro si uu u fahmo waxa ay ku kala tagsan yihiin islamarkaasna u helo waddo ay isgu soo dhowaadaan. Natiijadu waxay badanaa ku dambaysaa Guul-Guul-Guul.

Ujeeddada buuggani waa in uu hirgeliyo wadahadal wax dhisa oo ku aroora in fahamka la wadaago ilaa xadna heshiis lagu gaaro – iyo wada-tashi. Wadahadalka[7] iyo wada-tashiga marba mid ayaa ku habboonaan kara. Hase ahaate, wada-tashigu waa geedi-socod u baahan wakhti iyo hawl dheeraad ah, waxaana badana aad la isugu hawlaa xulashada ereyada, weedha hadalka iyo weliba heerarka (sida uu u kala sarreyo) codka dadka wada tashanaya. Dhammaan ammurahaasi waxay mid waliba xambaarsan tahay aragti qarsoon oo wax ka beddeli karta natiijada oo isfahamwaa iyo khilaaf abuuri karta.

## Aflaamtu waxay dhiirrigeliyaan wadahadalaka

Waxa jirta maah-maah oraneysa *'sawirku wuxu ka qiimo badan yahay kun erey"* waxa kale oo la yiraahdaa sheekooyinku waxay adeegsataa ereyo si ay sawir u xardhaan. Filimku labada sheyba wuu kulmiyaa. Sidaas awgeed, sheekooyinka iyo sawiradu waa aalado muhiim ah oo lagu wada xiriiro. Allah ( Subxaanahu Wa Tacaala - SWT) wuxu indhehenna hab-dhiskooda ku samayey aalad aynu ku dareenno muuqaalka iyo ereyada oo maskaxdeenna dhexdeeda isugu beddela sawir-u-yaal (Image), saadaal iyo riyo. Haatan, sawir-u-yaalku uma baahna in maskaxdeenu ka shaqayso oo waxa ay ka soo qaadaneysa aqoonta ku kaysan (maqalka, aragga, dareenka, suuraynta (imaging), abuurista iyo xasuusta) – waa marka aynu gudagallo doodda, wadahadalka ama wada-tashiga marka aynu maskaxdeenna dhexdeeda ku kala xulayneyno ama ku falanqayneyno ereyada iyo waxa loola jeedo ama micmohoodu

[7] Dialogue by Michelle Maiese (2003)

yahay. Haddii, marka si wanaagsan loo maamulo doodda, marka filim la daawado, waxa ka dhalan kara is-faham iyo ardayda oo maskaxdoodu u furanto dhanka wanaagga.

## Qorshaynta Kulanka – Ka Hor, Inta kulanku Socoto iyo ka Dib

Qaybtan buuggu waxay sharraxaysaa hab-socodka wadahadalka waxayna ka kooban tahay saddex marxaladood: (1) Qorshayna (2) fududaynta kulanka (3) dib-u-egiis casharradii laga bartay.

### Kulanka Ka Hor – Qorshaynta

In si taxadar leh loo qorsheeyo waxay fure u tahay guusha xisadda. Ujeeddadu ma ahan in la dejio qorshe aad u tifaftiran oo tallaabo kasta qeexaya. Taasi ma fiicna sababta oo ah in aaney kooxdu marnaba ugu dhaqmi Karin sida aad u qorshaysato. Qorshaha waxa loo dejiya si fudud oo haddii la rabo la iska tuuri karo inta kulanku socodo. Hase aaatee, qorshaha tifaftiran waxa loo dejiya in uu fududayaha ama macallinka ka taageero in uu ku ogaado wixi dhibaatooyin ah oo si lama filaan ah u soo bixi kara, maxa laga fili kara in laga gaaro iyo in uu wakhtiga ku ilaaliyo. Qorshaha saxda ahi wuxu ka-qayb-galayaasha u abuura kalsooni ay ku dareemaan, isla markaasna uu fududayuhu awood uu ku maareeyo kulanka ka helo.

#### Muhimadda looga dan leeyahay

Ujeeddada guud ee qorshaha kulanku waa in ay si cad u qeexan tahay – maxay dadku isugu imanayaan, maxay jecelyihiin in ay uga soo baxdo? Adiga laftaada waa in ay kuu cad yihiin waxa aad ka fileyso in ay kaaga soo baxaan xisadda. Haddii ay ujeeddadadu ka duwanaato tan ka-qayb-galayaasha, adigu fududaye ayaad tahay oo waxa kugu waajib ah in aad ku hagto kulanka sida ay iyagu ku gaarayaan ujeeddadooda.

Naqshadda kulanka waxa haga ujeeddada ama yoolka iyo hawlaha la qorshaysto in la qabto. Had iyo jeer is weydii *"sidee ayeey tani ugu habboon tahay kulanka yoolkeeda"*, taasi waxay ku geyaysiineysaa in wax waliba isgu kaa dubbadhacaan.

*Lifaaqa 1 – waxa aad ka heli kartaa liiska waxyaabaha loo baahan yahay in aad qorshaha kulanka darsatid iyo naqshad aad ka dheegatid sida qorshaha loo dejiyo.*

Kulanka ka Hor:

- Isku day in aad dulmartid mawduuca wada-tashiga/doodda, aragtiyaha (qalabka kaa caawinaya);
- Maalin ka hor u sheeg ardayda kulanka soo socota;
- Si aad u xakamaysid caadifadaha gaar-gaarka ah ee ka-qayb-galayaasha isku day in aaad sii ogaatid dareenkooda iyo filitaankooda kala duwan.

*Su'aal (S): sidee ayaan ugu hirgrlinayaa ka-qayb-galayaashayda – rajadooda, waxa ay ka filanayaan iyo arrin kasta oo kale ee aan qorshaha ku xusi karo?*

Jawaab (J): sida ugu sahlan ama ugu fudud ee xogta ka-qayb-galayaasha lagu heli karo waa adiga oo ka codsada in ay soo buuxiyaan foom xog ururin. Haddii aad internet leedahay waxaad abuuraysaa sahan adiga oo adeegsanaya barnaamijkan - surveymonkey (http://www.surveymonkey.com/). Haddii kale waxa kugu filan foomka ka muuqda lifaaqa 2. Waxaad intaas oo dhan kaga kaaftoomi karta adiga oo u qabta ardayda kulan hor-dhac ah. Adeegsiga Kulankaas hor-dhaca ahi wuxu leeyahay saddex faa'iido:

- Wuxu ku siiya xog muhiim ah oo aad qorshaha uga baahan tahay wuxuuna kugu baraarujiyaa mawduucyo aad tebeysey.
- Wuxu ka-qayb-galayaasha ogaysiiya kulanka, wuxuuna siiya fursad ay wax ku biiriyaan oo dareensiisa in ay hawsha diyaarinta qayb ka yihiin.
- Waxa halkaas ka bilowda xiriirka ka-qayb-galaha iyo fududayaha.

## Madasha, Qaabka Gogosha iyo Kulanka

*Madasha iyo Qaabka Gogosha*

Waxa badanaa la dhayalsadaa saamaynta ay ku yeelan karto goobta lagu shirayo iyo sida ay u habaysan tahay si ay ka-qayb-galayaash ugu fududaato in ay isla falgalaan. Goobta ama madasha lagu shirayo waa in ay tahay mid soo jiidasho leh, hawo iyo raaxo leh, weliba waa in laga taxadaro in ay goobtu leedahay suuliyo, meel wax laga cabo, loona diyaariyo qaab ku habboon kulanka. Baahida gaarka ee ka-qayb-gale kasta waa in la tixgeliyo.

Madasha ama goobta shirku waa in ay fududayso isla falagalka iyo isu muuqashada ardayda. Sidaas awgeed, hadba sida loo goglo ama loo qaabayo madasha ayaa saamayn ku yeelaneysa dhaqdhaqaaqa kooxda:

- Adiga oo tixgelinaya ujeeddada hawsha, mawduuca laga doodayo iyo waxa ay kooxdu ka kooban tahay, waa xagee madasha ugu habbooni?
  - o Ma **goob furan** sida geed harkiis, mise dayrka?
  - o Ma **fasalka** gudihiisa?

- Qaabkee ugu habboon in loo dhigo?
    - o Ma sida “U” u jeeda dhanka fududayaha iyo saburada;
    - o Qaabka **“giraanta”** ama wareegga ahi wuxu u sahla ardayda in ay is arkaan islana falgalaan. Qaabka **“giraantu”** wuxu abuura dareen sinnaansho.

- Fiiro gaar ah waa in la siiyo:
    - o **Xasaasiyadda Jinsiga (Gender sensitivity)** – qaabka loo fariisanyo waa in uu tixgeliya xasaasiyadda ay leedahay jinsigu; gabdhahu waa in ay si xor ah uga qaybqaataan. U fariisi si aaney u dareemin diiqad ama ciriiri. Heerka codkana waa in si macquul ah loo xadayo.
    - o **Deegaanka ku Xeeran (Surrounding environment)** – ka taxadar iftiinka madasha, hawada, wax kasta oo carqaladayn kara iyo sida aad u dhigeyso aaladda maqal-muuqaalka.

- Waa maxay qalabka loo baahan yahay? What materials are necessary?
    - o Iska hubi in qalabka kaa caawinaya hawshu diyaar yahay (Aaladda Maqal-Muuqaalka, Sawir-gacmedyada, farshaxanka iyo gabayada IWM).
    - o Warqadda derbiga la suro oo wax lagu qoro (flipchart), Qalmaan, Casharka ardayda loo qaybinayo waxaas oo dhammi waa in ay kuu diyaarsan yihiin;

*Nuxurka iyo kaalinta fududayaha*

Kaalinta fududayaha waxa lagu tilmaama in uu yahay qof khabiir ku ah hab-socodka kulamada kooxaha, sidoo kalena kooxdu ay khibrad u leedahay mugga mawduuca. Taas mincneheedu waa in ay kooxdu iyagu go’aan ka gaarayaan waxa ay ka yeelayaan film-ka iyagoon fududayuhu ku faragelin. Hase ahaate, mar kastaba fududayaha waxa looga baahan yahay in uu aqoon u leeyahay mawduuca iyo arrimaha ku iman kara, sababta oo ah wuxu/waxay uga baahan yahay/tahay xilliga diyaarinta madasha iyo shirka. Xiriirka ka dhexaya fududayaha iyo kooxda waxa dhaawici kara marka kooxdu dareento in fududayuhu khibradiisa, dareenkiisa iyo aqoonta uu u leeyahay mawduuca uu dhinac ugu xagliyo.

**Sida loo Xejiyo Dhex-dhexaadnimada**

- Wacyigelinta ayaa ugu fiican si loo maareeyo u-xaqsooridda kooxda: ku baraarugsanow aragtidaada, dareekaaga iyo iilashada ku dhici karta mawduuca. Sidee ayeey kuu saamayn karaan?
- Waxaad ka fikirtaa kaalintaada. 'Waxaan hadda ku jira kaalinta macallin', 'waxaan hadda ku jiraa kaalinta fududaye', 'waxaan hadda ku jiraa kaalinta ka-qayb-gale'. Waxaaba ka sii fiican in aad kaalin walba u leedahay calaamad sida: dhuub gacanta lagu xirto/calaamad, koofiyad ama labis. Marba mid xiro si aad u garatid kaalinta aad ku jirto.
- Daacad u ahaw ka-qayb-galayaasha oo dhan una calool furnaw maagis. Ka codso iyaga in ay gacan ku siiyaan. Haddii aad in yar ka simbiriiraxatid dhex-dhexaadnimada oo ka-qayb-galayaasha midkood kuu sheego aqbal oo uga mahadnaq. Markaas dib ugu laabo kaalintii fududaye.
- Haddii aad ka maarmiweydo ama aadan dhex-dhexaad ka ahaan Karin, u sheeg ka-qayb-galayaasha. Haddii aad calaamad muujineysa kaalintaada xiratidna kaba sii fiican.
- Cid kale u keenso kaalinta khabiirnimo ama kalliye fududaye samayso.

## Marka kulanka lagu Gudajiro – Abuurista Madal ku habboon in wadahadal iyo wadatashi lagu qabto

Qaybtan waxa lagu eegaya waxyaabaha lagu fududayn karo doodaha, ayna ku jiraan baraarujin iyo jimicsi, ciyaaro iyo waxyaabo doodda xiiso geliya sida adeegsiga hawl-kooxeedyo, halxiraale iyo googaalaysi iyo maaraynta dareenka qallafsan ee kooxda. Marka aad qorshayneyso hab-socodka doodda waxa kuu dhibyaraada in aad ogaatid sida wax kastaaba isula jaanqaadi karaan. Waxa muhiim ah in aad had iyo jeer tixgelisid kooxda baahideeda ee aadan ku adkaysan qorshaha aad samaysay in uu u fulo sida aad u dhigtay. Waa in aad ja-jabnaan muujisid.

### Dejjinta Xeerka madasha iyo Xorriyaadka

Xeerka lagu maamulayo madasha iyo Xorriyaadka waxa samaysta oo ku heshiiya kooxda markii loo baahdana fududayuhu waa cuskan karaa haddi qayb ka mid ah kooxdu u hoggaansami waayaan. Waxa xeerarkani marka horeba wax ka taraan in ay taakulayaan wadahadal wax dhisaya iyo isla falgalka. Kooxda waa laga codsan karaa in ay curiyaan qodobada xeerka, sidoo kalena fududayuhu waa u illafi kara qodobada qaarkood in ay tixgeliyaan.

Tusaale

- Waxaan rabaa in la I dhegeysto aragtidaydana la xushmeeyo.
- Waxaan xaq u leeyahay in aan aqbalo ama diido aragtida inta kale.
- Waxaan xaq u leeyahay in aan doorto in aan sida ugu fiican uga qayb-galo oo raali gelisa baahidayda.

**Baraarujin, Firfircoonayn, Ciyyaro**

Shaqooyin badan oo ka mid ah kuwa kulanka u qorshaysan ayaa loo adeegsan karaa baraarujin, firfircoonayn (nashaad) ama ciyaaro lagu xiiso geliyo ardayda. Ujeeddada uun ayey ku kala duwan yihiin:

- *Baraarujin (icebreaker) – waa hab kooxdu isku barato, ku nasato habacsanaantana kaga baxdo. Waxa badana la adeegsadaa marka kulanka la bilaabayo. Shucuurta ardayda ayaa lagu dhisaa.*
- *Firfircoonayn (energizer) waa hab lagu dardargeliyo firfircoonida kooxda ama looga kiciyo gamaarka (hurdada) ku dhaca xubnaha inta ay kulanka ama xisadda ku jiraan. Maskaxda ayaa ugu nasata.*
- *Ciyyaro – labada nooc oo horeba waa loo adeegsan kara. In la istaajiyo kooxda oo ay jaamayaan ama gacmaha isqabsadaan oo kor iyo hoos u lulaan. Heeso xiiso geliyaana waa fiican tahay in la adeegsado.*

**Usmada Hawlaha**

- Wadaagista Baraarujinta (Icebreaker)

mid kasta oo ka mid ah kaqaybgalayaasha ha la wadaago saaxiibkiis arrin isaga ku dhowaantan dhacday ama uu la kulmay. Tusaale ahaan: “waxa isoo booqday saaxiibkay…roob ayaa meel uu jireyba isaga yimid…”. Sheekadaas oo kale waxay kulanka ku soo kordhisaa xiiso iyo firfircooni, waxayna sahashaa in ay ardaydu ama kaqaybgalayaashu isla falgalaan ayna xiriiraan.

Hubi in ay si kooban u sheegaan sheekadooda. Ha dhiirrigelin su’aalo iyo falanqayn ama in wax xayaysiiyo.

***Eeg lifaaqa 3 tusaale kale ayaad ka heleysaa…***

- Ciyaarta Sacabinta

Qof ayaa qolka dibedda looga saaraya. mid kale ayaa shay muhiim aha qarinaya. Dib ayaa loogu yeerayaa qofkii dibedda loo saaray. Wuxu bilaabaya in uu raaadiyo shaygii laga qariyey. Kooxda inteeda kale xoog ayey sacabka u garaacayaan mar kasta oo uu u dhowaado shaygii la qariyey, marka uu ka fogaadana tartiib ayey sacabka u garaacayaan ila iyo inta uu kka helayo.

- Magacyada Khudradda

Waxaad xulataa 5 nooc oo khudrad ah magacyadood. Tusaale ahaan Babay, Cambe, Liin, Moos iyo Qarre. Markaas ku wareeg giraanta oo qof kasta sii magaca nooc khudradda ka mid ah. Waxa markiiba meesha baxaya hal kursi si qof iyaga ka mid ahi kursi la’aan dhaco. Marka aad llaa shan jeer wareejisid waxa suurto gal ah dhammaan Qarihii ama Mooskii ayaa boosaskoodi beddelmayaan. Marka aad dhammaysaan cid waliba ha ku cararto si ay kursi u hesho. Qofka aan helin meel uu fariisto ay wareegga ku xiga.

- Tiro tobnaadda -10aad (baruurujin, barashada is xiriirinta iyo wadashaqaynta)

Dhammaan ha loo istaago habka giraanta. Qof kasta ha tirsado lambarka ku soo aada marka qofka u horreyaa uu 1 (kow), kan ku xigaa 2 (labo) …ilaa inta laga gaarayo lambarka 10, oo isagu ginaanta ka baxaya wuuna fariisanaya. Muhimmadu waa in aad iska ilaalisid in aan lambarka 10 (toban) kugu dhicin. Kooxdu iskaashi ayey ka yeelan kartaa in aan 10 kugu dhicin si aad giraanta ugu hartid. Arrinta fududayhaya ayaa laga rabaa in uu maareeyo si kooxdu u gaarto yoolkeeda.

## Maxa looga Gol-leeyahay Hawlahan

Hawlaha ciyaaruhu waxay u baahan yihiin in ay ka qayb-qaataan 2 qof iyo ka badan waana mededaalo wax ka beddela hab-dhaqanka kooxda, gaar ahaa ciyaaraha dhaq-dhaqaaqu ku jiro. Carruurtu aad ayey u jecel yihiin, dhallinta iyo waayeelkuna waa xiisayaan marka ay fursad u helaan. Ciyaaruhu waxay udub-dhexaad u yihiin tacliinta da'yarta, balse marka aynu kornaba waa ka haraynaa am aka xishoonaynaa, waxaynuna arkeynaa in aysan innagu habboonayn oo carruurta iyo da'yarta oo keliya ay ku habboon tahay.

Firfircoonida, nashaadka iyo qossolkuba waxay noolayaan jawiga hawshu ku socoto, maskaxda, jirka iyo naftaba. Hase ahaate, ciyaaraha waa loo adeegsan karaa waxbarashada iyo horumarinta mihnadaha. In la wada shaqayo, la xiriiro iyo in la is dhegeysto waxay doodda u soo hoysaa fursado fara badan. Tusaale ahaan, marka la dareemo in aan ciyaartu sidii la rabey u socon, waxa kooxda la weydiin kara su'aasha ah 'waayo'? Waxa soo ifbixi kara fursado la isku ay dhici karto in la samaysto xeerar cusub ama hab garsoore lagu doorto. Fududayuhu wuu joojin kara ciyaarta si uu ugu garsooro ama kooxda u weydiiyo *'maxaa idinka si ah"?* taasi waxay kobcisaa tacliinta waxayna kooxda ka taageertaa in ay wax ka beddelaan habka ciyaartu u socoto wixi khilaaf ahna ku xalliyaan.

### Hawsha Koox Kooban

Sababo badan ayaa jira in kooxda loo qaybiyo dhawr kooxood oo koob-kooban. Badanaa kooxda ballaran waxa suurto gal ah qayb ka mid ahi in ay afduubto ama fikradi cidi wadataa ka qaalib noqoto, halkaas waxa ku lumaya wax-ku-biirintii iyo hal-abuurkii inta kale. Kooxda yari ama koobani waxay isu oggolaata in xubin kasta hadalka ka boggato ayna dareemaan in aan la cabburin ee ka qaybqaateen hawsha. Bal waxayba dardar gelisaa hawsha goobta ka socota mar haddii ay dad badani si firfircoon uga qaybqaadanayaan.

Ka fikir kooxda sida aad u rabtid – dhismeheeda, isu dhellitirankeeda rag iyo dumar, khibradda iyo waayo-aragnimadooda iyo sida ay mawduuca u xiisaynayaan.

## Ku Kaabidda Doodda Su'aalo ku habboon

*"Wax is weydiintu waxay furfurtaa cakiranka, wixii adkaada, waxayna keentaa fursado wax lagu ogaado/barto."*
*"Questioning breaks open the stagnant, hardened shells of the present, opening up options to be explored."* – *waxa laga soo xigtey - Fran Peavey*

sheekaysigu wuxu fiican yahay marka su'aalo fiicfiican la is weydaarsado – waxa ka dhasha fikrado muhiim ah iyo ku fikirka hal-abuur waxtar leh:

- Isticmaal **su'aalo furan** (oo aan ahay kuwa looga jawaabo haa/maya) kuwaas oo horseedaya furfuranka maskaxda iyo in si dhab ah loo gudagalo sheekaysiaga ama doodda. Tusaale ahaan, waxaad u adeegsan karta su'aalaha in aad ku sar-gooysid sida ka muuqata taallada (pyramid) si ay ereyadu oo kala xoog badan yihiin.




- Isku day in aad raadisid xog dheeraad ah adiga oo kooxda weydiinaya – ma jiraan wax muhiim ah oo aynan ka hadlin?
- U talantaali su'aalaha kuwa xasaasiga ah iyo kuwa furan oo aan xasaasiga ahyn si aad u soo jeedisid ardayga dareenkiisa.
- Ha isku deyin in aad su'aalaha adigu ka jawaabtid, u daa ardaydu in ay ka jawaabaan.

**Isha ku hay (Keeping focus) –** haddii ay dhacdo in arday ka mid ah kooxdu in uu soo jeediyo su'aal ama arrin kale oo mawduuca ka baxsan. Is ku day in aad kooxda usoo bandhigtid in si ku-meel-gaar ah dhinac la isaga dhigo oo mar kale loo soo noqdo. Waxa arrintaas loo adeegsada 'parking ama parcheggio' sida badanaa loo yaqaan. Macnuhu waa in sida gawaarida si ku-meel-gaar ah meel loo dhigto in su'aashaas aan meesha ku jirinna la baarkin-garayo.

**‘Dhinac/dib u dhig’**

Habkani wuxu xaqiijiya in dhammaan fikradaha la wada qoray, ka-qay-galayaashuna aaney dareemin in la quursaday fikradohoodii. Mar kasta oo wax mawduuca aan la soconin soo kordhaan. Ha tuurin ee ku qor halka aad ku xasuusaneyso su’aalaha aad rabtid in loo soo noqdo. Taasi waxay kuu sahleysaa in aad sii wadatid mawduucii, ardayduna ay kalsooni ku qabaan in aan aragtidoodii laga tegin ee loo soo noqonayo. Hase ahaate, u qoonday wakhti ku filan oo aad su’aalaha la baarkin-garayey ku soo qaadid.

## Maaraynta Caadifadda iyo Khilaafka Kooxda Dhexdeeda

Aflaamta la soo bandhigo iyo wadahadalladuba waxay kicin karaan caadifad. Waxa laga yaaba in uu ka dhex aloosmo muran horseeda khilaaf. Marka ay xaaladdaasi oo kale dhacaan kaalinta fududayuhu waa in uu kooxda dejiyo oo kalsooni ay wada dareemaan ayna isku hallayn karaan. Waa muhiim in fududayuhu aad digtoonaado kana taxadaro waxa ka dhacaya madasha ama goobta shirka; sida dhaqdhaqaaqa, codka oo kor loo qaado, xiisadda. Waa inuu ilaaliyo degganaanshaha goobta si uu u soo dhexgalo haddii loo baahdo. Hadba hab-dhaqanka deggan ee uu fududayuhu muujiyo ayaa wax weeyn ka tari kara xaaldda jirta.

Sida ugu fiican oo fududayuhu u soo dhex-geli karo waa isaga oo arrinta daaha ka qaada. Ka dibna weeydiiya in arrintu sidaas tahay oo xaaladi jirto. Su’aalaha soo socda ayuu weydiin karaa haddii loo baahdo. Halkaas wuxu fududayuhu ku muujinaya mas’uuliyaddiisa uuna ku dhegeysto fasiraadaha kale oo laga qabi karo arrinta.[8] Waddo wadatashi ayaa markaas furmeysa.

- *Waxa ii muuqda in kooxdu wada aamusan tahay, ma laga yaaba in ay cidi wuxuun tiraahdo?*
- *Waxaan dareemay in “hebel” uu sii jeestey. Ma jirtaa cid I fahamsiin karta waxa dhacay?*
- *Waxa umalaynayaa in aad codka kor u qaaday. Mise waan is moodsiiyey!*

Waxa loo baahan yahay in fududayuhu aad ugaa taxadaro arrimahaas xasaasiga iyo in uu kooxda oo dhan, qayb ka mid ah kooxda ama shakhsi keliya u jeedo ama uu marba mid ku dayo.

[8] Using ‘I-statements’ (http://www.communicationandconflict.com/i-statements.html)

**Shucuurta (Emotions)** – dadku in ay shucuur muujiyaan waa caadi, kol haddaaney dhib lahayn. Hase ahaate, wax-sheeggoodu badanaa dad ayuu ka caraysiin karaa; gaar ahaan dadka neceb ama ka soo horjeeda colaadda. Shucuutu waxay beddeli kartaa dhibaato haddii loo dhigo si aan habboonayn ama falgal loo adeegsado. Waxay u baahan yihiin in laga shaafiyo waxa ay ka cabanayaan lana tixgeliyo farriinta ay rabaan in ay gudbiyaan. Waxa habboon in marka hore la xakamayo shucuurta inta aan waixii sababay loo daadegin. Tusaale ahaan, u oggolaw qofka caraysan in uu qayliyo, kor iyo hoos eeg-eeg, balse ha u oggolaan in uu shucuurtiisa ku mu caytamo ama si kale oo qalloocan u muujiyo.

In laga codsado qofka caraysan in uu xisadda ka baxo, ama shirka la joojiyo gebi ahaanba waxa lagu dhaqaaqi karaa oo keliya marka si kale wax loo maarayn waayo. Taasi waxay abuuri kartaa xaalad ka xun, ileeyn shucuurtu kuma koobna oo keliya cidda caraysan ee dhammaan ka-qayb-galayaasha ayeey saamayneysa. Marka hore shucuurta xakamay, ka dibna wakhti sii ay kooxdu wax iskaga weeydiiso xalna laga gaaro.

**Dib-u-eegis iyo dib-u-qaabayn** – waa labo aaladood oo ku habboon in khilaaf taagan lagu maarayo. Dib-u-eegistu waxay soo koobtaa wixii la is yiri. Waxay u muujisaa inta is haysa in la dhegeustey oo codkooda la maqlay. Taasi waxay ku dhiirrigelisaa in ay ka haraan wixii is-fahamwaa ah. Dib-u-qaabayntana waxa laga saara wixii xadgudub ah, eedayn ama ereyada xiisad kicin karey iyada oo lagu beddelayo ereyo ka fudud oo ka macaan.

*Lifaaq 4 – Eedda oo dusha laga saarayo luqadda*

**Is-fahamwaa (Miscommunication)**

Waxaynu had iyo jeer isku daynaa in aynu wax kala dhig-dhigo oo xittaa dunida qayb-qaybino si aynu u dareenno isku-murugsanaanteeda (complexities). Waxaynu isla markaas ilawnaa in kala dhig-dhigiddaasi aaney wada masilin dhammaan qaybaha dhabta ah ee dunida. Dhibaatooyinka dadka ka dhexaya, siiba kuwa sooyaalkooda ama dhaqankooda la xiriira, waxa sababa sida ay hadalka u yiraahdaan ama loo fasirto, oo weliba uu male-awaal khaldani ku jiri karo, sida *"Hadaloow nimba si kuu yiri ninna si u qaadey".*

Khilaaf ayaa ka iman kara in-fahamwaaga oo haddii aan la wajihin dhibaato keeni kara. Haddaba, waxa loo baahan yahay in laga baaraan dego sida loo wada xariirayo oo hadalka iyo luqadda lagu gudbinayo la lafa guro lana turxaan bixiyo.

## Is-dhegaysiga[9]




Calaamaddan Farta Shiinaha ku qorani waxay inoo sheegaysaa in haddii aynu rabo in aynu is dhegaysano loo baahan yahay in aynu labada dhegoodba is furno, isu jeedno (aynan kala qarsoonayn), isuna calool furannahay.

Isu dheganuglaantu waa iyada oo aad dhab ahaan la joogtid qofka aad dhegaysaneyso oo kula hadlaya, maskaxda aad u furtid, adiga oo meel iska dhigaya wax kasta oo aad isu qabteen iyo xukunkaaga qof ahaaneed oo la xiriira waxa uu ka hadlayo. Malaha waxa ugu fican in aad qof si dhab ah u dhegaysatid in aad 'aamus ku dhegaysatid'. Markii laba qof ama koox ay aamusan tahay, waxa laga yaaba in qof la soo boodo in uu wax yiraahdo. Ku dhiirigeli in qof wax sheego ama uu aamuska jebiyo.

Is-dhegaysiga waxa laga rabaa in qofku:

- Raadiyo in uu wax fahmo inta aanu raadin in asaga la fahmo.
- Aanu wax iska xukumin
- Uu dhammaan dhegihiisa amaahiyo cidda uu dhegaysanayo
- Aamuska uu si maan-gal ah u adeegsado

## Isdhegaysiga lamaanka (Paired Listening)

In labo-labo ama lamaan la isu dhegaysto waxay horumarisa habka is dhaagidda. U qaybi kooxda lamaane ama weydii in ay iyagu is xushaan. Markaa u sheeg in labo kastaa ay samayaan min saddex wareeg oo is dhegaysi ah iyaga oo miilaysanaya ama talantaaliyaaya. Xubin kasta oo ka mid ahi ha xulato/xusho sheeko dhab ah oo soo martay in uu uga sheekayo saaxiibkiis.

Wareegga 1: labada xubnoo isku mar ha wada sheegeen sheekadooda Both try to tell each other their respective stories at the same time.
Wareegga 2: Mid ka mid ahi ha sheego/sheegto sheekadiisa/sheekadeeda kan kale ha u dhegeeysto isagoon xiiso u hayn. Ka bacdina ha is weeydaarteen.
Wareegga 3: mid ha sheego/sheegto sheekadiisa kan kalena si feejigan ha u dhegaysto. Markaas is weeydaari.

Marka ay dhammaystiraan saddexdaas wareeg kooxuhu ha iska waraysteen wixii xubin kasta khibrad uga kordhay iyo waxa uu qof kasta dareemay markii uu ku jirey

9 The Art of Active Listening (http://www.mitoaction.org/pdf/tipActiveListening.pdf)

kaalinta dhegaystaha iyo marka uu isagu hadlayey. Markaa kooxda oo isu dhammi ha is dhaafsadeen faallada iyo falanqaynta wixi ay ka kororsadeen is-dhegaysiga.

### Fiiro gaar ah

- **Xaaladda Shakhsiga ah** – haddii uu jiro wer-wer qof u gaar ah waa lala wadaagi kara haddii aaney ahayn arrin sir culus u ah qofkaas;
- Ardayda u muuji **ja-jabnaan** si ay u dareemaan in ay iyagu madasha leeyihiin; ha ku khasbin qaab ama tiro aysan rabin. Waxay u baahan yihiin in ay xushaan sida ay isula fal gelayaan;
- **Ka-qayb-gal buuxa/la-iska-wada-arko:**
    - o Waxaad xaqiijisa in laga wada qayb-galo waxna lagu biiriyo wadahadalka, adigoon culays gaar saarayn xubnaha aamuska badan;
    - o Isu dheelitirka jinsiga ah (Lab iyo Dheddig) aad uga feejignow.

## Gunnaanadka/Qiimaynta Kulanka

Is-weydaarsiga sida ay doodda ama wadahadalku u dhacay, raadinta sida looga helay ama loo xiisayey iyo soo ururinta talooyinka iyo tusaalooyinka waxay ka caawiyaan fududayyaha iyo ardaydaba sidii ay waayo aragnimo uga kororsan lahaayeen. Sidaas awgeed, waxa habboon in uu kulan kasta qayb muhiim ah ka ahaado. Qiimayntu waxay wax weeyn ka taraysaa in kulamada kaas ka dambaya la hagaajiyo. Qiimaynta waa lagu kala duwanaan karaa, markaas muhiim ma ahan in ay kooxdu isku aragti ka dhiibtaan ama ay heshiis ku yihiin waxa qiimaynta ka soo baxa.

Si ay kuugu fududaato hagaajinta iyo qurxinta kulamada kan ka dambaya isku day in aad naqshadayso foomam aad ku soo ururisid fikradaha iyo aragtida kooxda, adiga oo isla markaas siinaya wakhti ku filan oo ay ku soo buxiyaan ayna dib ugu eegaan wixii ay ka ogaadeen ama waayo aragnimadii ay ka kororsadeen kulanka. Waxay ku fiican tahay in hawshaas la galo dhammaadka kulanka ama xisadda.

**Dhawr siyaabood oo qiimaynta loo samayo iyo sida khibradaha loogau waayo-arko**

- U fariisi qaab giraan ah (wareeg) markaas ka codso in ay ka qayb-galayaasha qaar ka mid ahi ku tabarucaan in ay soo ururiyaa casharadii laga bartay iyo wixi ka soo baxay wadahadalka. Kooxda inteeda kale wax ha ku biiriyaan halka ku habboon.
- Waxaad kale oo gelisaa wareeg labaad oo qof kastaa uu ku cabbirayo dareenkiisa, amaba waxaad u diyaarisaa warqad yar oo ay ku qoraan waxa dareenkoodu yahay. Jawaabo aan laaqi ahayn u diyaargarow oo ha ka argagixin.
- Wareegga saddexaad weydii xubin kasta in uu/ay sheego/sheegto mid ama labo qodob oo sarreeyey ama hooseeyey (high and Low) ee doodda/ wadahadalka.
- Weeydii "maxaad kala hoyaneysaa wadahadalkan?". Taasi waxay u fududayneysaa in ay ogaadaan waxa ay ka faa'iidaysteen kulanka.
- Dib u soo xussusi liiskii ay qorteen bilowga kulanka oo la xiriirey waxa ay ka filayaan iyo ujeedada, ka dibna weydii in ay gaareen yoolalkaas iyo wixi ay ka filayeen.

*Lifaaq 5 – waxa ku qoran foom lagu samayo qiimaynta oo qoraal ahaan loo heli karo.*

## Tixraac

*(Eeg bogga 80 si aad xog dheeraad ah u heshid)*

Dr. Diane Bretherton, Jane Weston and Vic Zbar, *Peace education curriculum development in post-conflict contexts: Sierra Leone.*

Eric E. Vogt, Juanita Brown and David Isaacs, *The Art of Powerful Questions – Catalyzing, Insight, Innovation and Action,* 2003.

Institut de Recherche et de Dialogue pour la Paix (IRDP*), Guide de Facilitation pour l'Ecole du Débat,* January 2007.

Isaac Olawale Albert and Oluremi Albert, "*Strategies for Peace Education Integration in Ecowas Member States' Tertiary School Curricula*," *Conflict Trends,* 17.

Koenraad Van Brabant, *Facilitation Challenges – and Attention Points,* Interpeace, Unpublished Paper, March 27, 2010.

# Cutubka 2: Nabadda, Dib-U-Heshiisiinta Iyo Amniga

## Hordhac

Inta badan shacabka soomaaliyeed waxay ku noolaayeen cabsi joogta ah in ka badan 20 sano. Khilaafaad daba-dheeraaday oo dhanka siyaasadda, bulshada iyo diintaba ah ayaa hareerayey nolol maalmeedka inta badan.

Da'yar badan ayaan usoo joogin faa'iidada nidaamka iyo kala danbaynta kuna barbaaray burbur, colaado iyo khilaaf joogta ah. Nabadda, dib-u-heshiisiinta iyo amniga waa erayo aad loo hadalhayo kuna soo noqnoqda inta badan afka. Dhanka kale xallinta khilaafka, nabaddaynta iyo nabad-ilaalintu waa oraahyo aad ugu badan hadalhaynta bulshada rayadka ah iyo beesha caalamka.

Iyada oo ay tahay in qof waliba door ka qaato xal-u-raadinta arimahan ayaa haddana dhalintu ay tahay cidda ugu mudan ee ay tahay in door muhiim ah ay ka ciyaarto arimaha nabaddaynta iyo xalinta muranada. Dhalinta maanta ma noqon karaan hoggaanka barito haddii ay sii ahaadaan xabaada lagu hurinayo colaadaha jira.

Waxaa la qiyaasaa in dhalinyaradu tahay qeybta ugu badan bulshada ku nool Puntland, haddana waxay dhibane u yihiin saamaynta colaadaha sabab walba ha la hadeene. Waxay u nugul yihiin in si fudud loo kala qeybiyo qoryana la isugu dhiibo, waa awoodda ugu badan ee loo diro furimaha colaadahu ka jiraan, waxay kaloo halis u yihiin in ay adeegsadaan kooxaha dawlad-dumiska ah ee mayalka adag iyo kuwa raacsan.

Dhalinyaradu waxay door asaasi ah ka qaadan karaan dadaalada nabadaynta (tusaale, colaaddii ka dhacday Rako dhalintu waxay iska diideen in ay u dagaalamaan jiifooyinkooda). Awoodda dhalintu ay u leeyihiin in ay isu muujiyaan koox bulsho oo madax banaan iyo rabitaankooda ku aadan in ay isu abaabulaan sidii kooxo gooni u tagaan waxay halis iyo fursadba u noqon kartaa dadaalada nabadaynta.

Dhanka halista, dhalintu waxay u nugul yihiin in si fudud loo dhaqaajiyo looguna adeegsado tallaabooyin horseedi kara colaad iyo shaqaaqo iyada oo looga faa'iidaysanayo shaqo la'aanta haysata iyo bahiyaha u gaarka ah. Haddaba waxaa lagama maarmaan ah in dhalinta laga qeybgaliyo dadaalada nabadaynta iyo dib-u-heshiisiinta bulshada madaama Puntland ay tahay meel ay ka jiraan is-ku-dhacyo soo noqnoqda dib-u-heshiisiintuna ay muhiim tahay si loo xoojiyo wadajirka umadda.

Dhanka fursadaha marka laga eego, dhallinta inta badan way xoog iyo maskax furan yihiin waxayna leeyihiin himilooyin. Haddii awoodahan dhalinyarada ku duugan si wanaagsan loo adeegsado loona xakameeyo markaasi waxay xoojin kartaa nabadda. Haddaba cutubkan ka tirsan Bare-Kaabaha waxaa looga gol-leeyahay in uu baraha ka caawiyo haggida doodo furan oo ku saabsan nabadda, amniga iyo dib-u-heshiisiinta kuwaasi oo dhexmara guud ahaan dhalinyarada gaar ahaana ardayda fasalada sare.

## Sida loo Adeegsanayo Cutubkan

cutubakani wuxu macallimiinta ku hubaynayaa aqoon ay ku fududayaan doodaha ku saabsan mawduucyada Nabadda, Amniga iyo dib-u-heshiisiinta. Wuxu kale oo tixgelin gaar ah siinaya fahamka khilaafka, maadaama uu nuhiim ama saldhig u yahay in la sharraxo doodaha la xiriira khilaafka.

Cutubku wuxu ku bilaabanaya in uu xog hor-dhac ah ka siiyo macallinka/fududayaha waxa ay dooddu ka kooban tahay. Taas oo macallinka u noqoneysa meel uu ka bilaabo doodda. Waxaase lagu dhiirigelinayaa macallinka in uu baaritaan dheeraad ah samayo ama u yeerto cid waayo-aragnimo u leh arrimaha laga doodadayo ama laga wadahadlayo.

Qaybtan soo socota waxay fududayaha ama macallinka siiyeysaa aalado uu ardayda ku hawlgeliyo. Aaladahaas waxa loo adeegsan kara gaar-gaar ama si wadajir ah, waana kuwa soo socda:

- **Su'aalaha lagu bilaabayo.** Macallimiintu waxay ku kordhin karaan su'aalaha qorshaysan kuwo la xiriira doodda ama xaaladaha iyo ammuraha markaas taagan ku saabsan.
- **Talo-soo-jeedinta hawl** ardayda ka caawisa/taageerta in ay si dhab ah uga fikiraan kuna soo dabbaasha mawduuca.
- **Sawirro la xiriira mawaadiicda.** Macallinku/fududayuhu inta aanhawsha la guda gelin ayuu u soo bandhigi kara ardayda sawir isaga oo waydiinya su'aalaha ah – maxaad ku aragtaa/kaaga muuqda sawirka? Sidee ula xiriira mawduuca laga doodayo, markaas ka dibna uga gudbo su'aalaha kale. Hawshaas waxa lo qaban karaa kooxo koob-kooban ama iyaga oo isu dhan.
- **Maahmahyo ama gabayo mawduuca la xiriira.** Su'aalo bilow ah ayaa loo soo jeedinaya ardayda kuwaas oo la xiriira mawduuca. Waxa kale oo loo baahan yahay in ardayda lagu dhiirrigeliyo in ay curiyaan gabayo mawduuca la xiriira.
- **Liiska Aflaam Dukumentari ah oo Mawduuca la Xiriira.** Suurto gala ma ahan in macallin walbaa uu awood u leeyahay in uu soo bandhigo aflaam la xiriira

mawduuca. Balse waxa Xarunta Horumarinta Cilmi-baarista Puntland diyaarisay tiro aflaam ah oo isla cutubkan dhammaadkiisa ku taxan iyaga oo ay weheliyaan su'aalaha la xiriira iyo soo jeedimo kaleba.

## Khilaafka

Inta badan khilaafka iyo nabaddu waa laba arimood oo isku xiran, sidaa darteed waxaa lagama maarmaan ah in aan fahamno sida nabadda lagu xasiliyo iyo saamaynta ba'an ee khilaafku ku yeelan karo nolosheena. Nabad in ay jirto macnaaheedu maahan in aan khilaaf jirin! Waxaa jira bulshooyin badan oo nabad kuwada nool haddana khilaaf ka dhaxeeyo. Bulshooyinkaasi waxay ku guulaysteen in ay si uun u maareeyaan khilaafkooda si uusan isugu rogin colaad waxyeesha noloshooda.

### Qeexitaanka Khilaafka:

**a)** *Khilaafku waa xaalad dhexmarta laba qof ama in ka badan(kooxo, ururo, dawlado) marka ay ku kala duwan yihiin aragtida, ay leeyihiin ujeedooyin kala gaar ah, baahiyo iyo dhaqan kala duwan ama ay isku qabtaan sida ay u wadaagayaan kheyraad xadidan oo ka dhaxeeya.*
**b)** *Khilaafku inta badan wuxuu dhaca marka laba kooxood ama ka badan ay mid ka mid ah u aragto in danaheedii iyo baahiyaheedii aan wax laga qaban, ama cadaawad ay kala kulanto koox/kooxaha kale.*

Dhinacyada khilaafku ka dhaxeeyo waxay noqon karaan ash-khaas, kooxo yar-yar ama balaaran ama dawlado. Danaha kooxaha ee horseeda khilaafka iyaguna way kala duwanaan karaan waxaana ka mid ah kuwa soo socda:

- Khilaaf ku salaysan ***kheyraadka*** — sida dhul, hanti, ilo tamareed, cunto iyo sida loo wadaagayo ama loo qeybsanayo.
- Khilaaf ku salaysan ***awood/hoggaan*** — sida awood qeybsiga xukunka iyo kawada qeybgalka go'aan gaarista siyaasadda.
- Khilaaf ku salaysan **hayb** — sida kala duwanaanshaha dhaqanka/diinta, dabaqada iyo siyaasadda kuwaasi oo dadku kala raacsan yihiin.
- Khilaaf ku salaysan **maqaam/darajo** — sida in dadku aaminsan yihiin in si wanaagsan loola dhaqmo loo xushmeeyo isla markaana loogu tixgaliyo dhaqankooda iyo dabaqada bulsho ee ay yihiin.
- Khilaaf ku salaysan **qiyyam/mabaadi**' — gaar ahaan waa kuwa la xiriira kala duwanaansha diimaha, dhaqanka, nidaamka dawladnimo iyo caqiidada/aragtida.

Khilaafyadu waxay noqdaan kuwo shaqaaqo keena marka kooxuhu ay ku guuldaraystaan in ay si nabad ah u maareeyaan farqiga u dhaxeeya ama kooxi isku daydo in ay hor-istaagto danaha koox kale.

### Astaamaha Khilaafka

- **Khilaafku waa qeyb ka mid ah hab-nololeedka.** Marka laba qof ama in ka badan ay meel kuwada noolyihiin waxaa jira khilaaf ama waxaa suurtagal ah in uu dhaco khilaaf. Nolol aan is-qabasho lahayn waa mid aan dhadhan lahayn.
- **Khilaafku ma fiicna mana xuma/wanaagsana.** Qaabka aan u xalino khilaafka ama natiijada laga dhaxlo ayaa noqon karta mid fiican ama xun. Looma baahna in aan kasoo horjeesano is-qabasho oo dhan, balse waxaa muhiim ah in aan ogaano sidii aan khilaadkeena u maareyn lahayn ugana baaqsan lahayn isku-dhac keena dhimasho iyo nabad-galyo xumo.
- **Khilaafka faa'iidada lihi wuxuu leeyahay natiijo wanaagsan.** Danaha dadka iyo rabitaankooda in ay wax ogaadaan waa kuwa kala duwan lehna sababo kala duwan. Dadku inta badan waxay u abaabulan yihiin sidii kooxo isku dan ah lehna aqoonsi iyo duruuf u gaar ah.
- **Khilaafka burburinta ku dhisani waxaa laga dhaxlaa natiijooyin aan wanaagsanayn.** Marka dhinacyadu doonayaan in ay is-maquuniyaan, kooxiba kooxda kale qabsato ama meesha ka saarto markaasi khilaafku wuxuu noqdaa mid aah la mahadin. Khilaadyada noocaan ah waxay isu rogaan colaado baaha siina xoogaysta.

## Nabadda

Ma jiro qeexitaan la isku raacsan yahay oo nabaddu leedahay lakiin waxa la isla qiraa in ay nabaddu tahay:

- Xaalad ka maran dagaal, shaqaaqo, colaad iyo cadaawad, taas oo dadka u suurtagalisa in ay si wadajir ah u noolaadaan una wada shaqaystaan.
- Xalaad aan lahayn qas/arbushid, ka-caraysiin, werwer, dhibaato, sawaxan ama ficilo kale oo aan loo baahnayn.
- Xalaad lagu wada noolyahay si wadajir ah, dadkuna ay ka dhaxeeyso is-kaashi iyo xiriir wanaagsan.

### Nabadaynta (Peacebuilding)

Nabadayn waxaa loola jeedaa dhamaan hawlaha la xiriira nabad ka dhex-dhalinta dhinacyada is-haya. Nabadayntu ma ahan oo kaliya in nabad la horseedo, waxay kaloo ku lugleedahay sidii nabadda loo xoojin lahaa loona joogtayn lahaa isla markaana loo heli lahaa hanaan bulshooyinku ku maareeyaan khilaafkooda isla markaana ay uga

baaqsadaan in ay dib ugu noqdaan colaad. Marka Puntland la jooga waxaa lagama maarmaan ah in la tixgaliyo dhamaan dhinacyada bulshada si ay qeyb uga ahaadaan nabadaynta gaar ahaan culimada diinta, madax dhaqameedyada, dhalinyarada iyo haweenka.

## Aragtida Islaamka ee Nabadaynta

Diinta Islaamku waa diin nabadeed waxay dhiirigalisaa xaq-soorka, xushmada iyo xuquuqda aadamaha. Aragtida Islaamka ee nabadaynta iyo guud ahaan ilaalinta nabaddu waa mid ku qotonta mabaa'di asaasi ah kuwaasi oo gundhig u ah in nabaddu waarto. Sida ku cad buuga lagu magacaabo "Aragtida Islamka ka qabo Nabadda iyo Colaadda" ee u qoray aqoonyahanka Dr. S. Ayse Kadayifci-Orellana, wuxu ku lafaguray fikradaha Islaamka ee arrimaha nabadda iyo mabaadii'da saldhigga u ah:

**Tawxiidka (in la qiro kalinamada Allaah):** In wax kasta lagu bilaabo "waxaan ku bilaabay Allaah oo "Raxmaan" iyo "Raxiim" ah aya saldhig u ah dhaqanka Islaamka. Tawxiidku waa in la qiro kalinimada Allah iyo in uu Allah abuuray wax walba. Sidaa darteed waxaa loo aqoonsanyahay Tawxiidku in uu yahay asaaska caalaminimada Islaamka ee tusinaysa midnimada nolosha adaamaha (iyada oo aan loo eegayn diinta, jinsiga iyo haybta) waxay kaloo ku baqaysaa wadajir, is-fahan iyo dulqaad dhamaan adaamaha dhexdiisa. Iyada oo laga duulayo in bini'aadamku uu mid yahay hal asalna leeyahay iyo hal Eebe, aragtida Islaamku waxay ku qotontaa in la dhawro wadajirka, nidaamka iyo nabadda taas oo Muslimiina u horseedaysa in ay nabad iyo wadajir ku waaraan arlada dusheeda. Sida uu aqoonyahan Kadayifci-Orinella uu xusay, oraahda Tawxiid waxay si fiican ugu qeexantahay kitaabke Eebe gaar ahaan ayaadaha:

( يا أيها الناس إنا خلقناكم من ذكر وأنثى وجعلناكم شعوبا وقبائل لتعارفوا إن أكرمكم عند الله أتقاكم إن الله عليم خبير)

*Al-Xujraat (13)*

"Dadoow waxaan idanka abuurnay rag iyo dumar, waxaana idanka yeelnay umaddo iyo qabaa'il si aad isu aqoonsataan, kiina u wanaagsani Allah agtiisa waa kan idiinku cabsida badan, Allaahna waa mid aqoon iyo waayo-aragnimo badan" Al-Xujraad (13).

(لِكُلٍّ جَعَلْنَا مِنْكُمْ شِرْعَةً وَمِنْهَاجًا وَلَوْ شَاءَ اللَّهُ لَجَعَلَكُمْ أُمَّةً وَاحِدَةً وَلَكِنْ لِيَبْلُوَكُمْ فِي مَا آتَاكُمْ فَاسْتَبِقُوا الْخَيْرَاتِ)

*Al-Maa'idah (48)*[10]

[10] S. Ayse Kadayifci-Orellana, "Muslim Perspectives on War and Peace," in Mohammed Abu-Nimer & David Augsburger, eds., Peace-Building by, between and beyond Muslims and Evangelical Christians (Lanham, MD: Lexington Books, 2009), 21-22.

Mid walba oo idanka mid ah waxaanu u dajinay sharci iyo marin, haddii uu Allaah doono wuu idanka dhigi lahaa hal umad lakiin waa in la idinku imtixaano wixii uu Allaah idin siiyay ee uu tartama samaha" Al-Maa'idah (48).

**Naxariis:** Sida naxariistu ay tiir-dhexaadka ugu ahay dhaqanka Islaamka waa mid laga dheehan karo magacyada Allaha iyo oraahda "Bismilaahi Raxmaani Raxiim" ee macnaheedu yahay "waxaan ku bilaabayaa magaca Allah, midka naxariista guud iyo tan gaarka ah leh". Dad badan oo Islaam ah ayaa kalmad si joogta ah ugu hadal qabsada noloshooda oo dhan, waxay kaloo ku xusan tahay bilowga suuradaha Quraanka oo dhan (marka laga reebo Suuratul Tawba). Ayaadaha tusinaya naxariista Islaamka iyo Eebe waxaa ka mid ah:

**(وَرَحْمَتِي وَسِعَتْ كُلَّ شَيْءٍ)**

*Al – A'raf (156)*

"Raxmadayda ayaa cid walba deeqda/deeqday" – Al-Acraaf (156)

(ثمَّ كان من الَّذين ءامنوا وتواصوا بالصَّبر وتواصوا بالمرحمة* أولئك أصحاب الميمنة*)

*Al-Balad (17-18)*

Waxa taas soo raaca, "Kana mid ahaaday kuwa Allaah rumeeyay, isu dardaarmay dulqaad iyo naxariis. Kuwaasi ayaa ah kuwa toosan/saxda ah" – Al-Balad (17-18).

Suubanaheena Maxamed – Nabad iyo Naxariisi Korkiisa ha Ahaatee (NNKH)- wuxuu ku yiri xadiis uu ka soo weriyay Allah (Xadiisul Qudsi):

**(إن الله كتب كتاباً قبل أن يخلق الخلق: إن رحمتي سبقت غضبي، فهو مكتوب عنده فوق العرش)**

"Allaah wuxuu dajiyay kitaab inta uusan dadka abuurin wuxuuna ku qoray "Naxariistayda ayaa ka hormartay/horeeysa caradayda".

Qur'aanka Kariimka ahi wuxuu Nabi Maxamed NNKH ku tilmaamay in loo soo diray in uu dadka u naxariisto/u dhibriyo una turo:

**{وَمَا أَرْسَلْنَاكَ إِلَّا رَحْمَةً لِلْعَالَمِينَ}**

*Al-Mu'minuun (107)*

Sida ku cad aayadan iyo aayado kale iyo waliba xadiisyo, isu-dhibrinta iyo in naxariis la isu galo waa samaha Islaamka, waxaana laga doonayaa ruux walba oo Muslim ah in uu kulo dhaqmo dadka naxariis iyo dhibrin isaga oo aan tixgalinayn diinta, isirka ama jinsiga qof. Iyada oo laga duulayo mabaadi'dan wanaagsan, qof walba oo muslim ah waxaa laga doonayaa in uu dareenka xanuunka la qaybsado dadka kale isla markaasna ay ka nabad galaan dhibkiisa, taa badalkeedna in uu xushmad uu u muujiyo dhamaan dadka.

**Fitrah:** (dabciga bani’aadamka ee rabaaniga ah): Waxay kale oo tusinaysaa in Eebe shay walba u abuuray sabab isla markaan uu ku manaystay bini’aadaamka dareen iyo xoriyad ay ku doortaan tubtii ay qaadi lahaayeen. Mabada’ Fitradu wuxuu qirayaa in bani’aadamku uu yahay abuur Eebe oo dhamaystiran isla markaana dadku siman yihiin xataa haddii ay kala duwanyihiin. Ayaadaha xoojinayaa arintaasi waxaa ka mid ah:

**(ولقد كرمنا بني آدم وحملناهم في البر والبحر ورزقناهم من الطيبات وفضلناهم على كثير ممن خلقنا تفضيلا)**

*Al-Israa (70)*[11]

“Waanu karaamaynay bani’aadamka waxaanu ku xanbaarnay bariga iyo badda, waxaanu ku quudinay waxyaalaha wanwanaagsan, waxaana ka sare marinay in badan oo ka mid ah wixii aan abuurnay”. Al-Israa (70).

**{ لقد خلقنا الإنسان في أحسن تقويم }**

*A-Tiin (4)*

“Hubaal, dadka waxaan u abuurnay muqaal kan ugu quruxda badan/ugu wanaagsan/ ugu toosam” A-Tiin (4).

**وَإِذْ قَالَ رَبُّكَ لِلْمَلَائِكَةِ إِنِّي جَاعِلٌ فِي الْأَرْضِ خَلِيفَةً قَالُوا أَتَجْعَلُ فِيهَا مَنْ يُفْسِدُ فِيهَا وَيَسْفِكُ الدِّمَاءَ وَنَحْنُ نُسَبِّحُ بِحَمْدِكَ وَنُقَدِّسُ لَكَ قَالَ إِنِّي أَعْلَمُ مَا لَا تَعْلَمُونَ * وَعَلَّمَ آدَمَ الْأَسْمَاءَ كُلَّهَا ثُمَّ عَرَضَهُمْ عَلَى الْمَلَائِكَةِ فَقَالَ أَنْبِئُونِي بِأَسْمَاءِ هَؤُلَاءِ إِنْ كُنْتُمْ صَادِقِينَ * قَالُوا سُبْحَانَكَ لَا عِلْمَ لَنَا إِلَّا مَا عَلَّمْتَنَا إِنَّكَ أَنْتَ الْعَلِيمُ الْحَكِيمُ * قَالَ يَا آدَمُ أَنْبِئْهُمْ بِأَسْمَائِهِمْ فَلَمَّا أَنْبَأَهُمْ بِأَسْمَائِهِمْ قَالَ أَلَمْ أَقُلْ لَكُمْ إِنِّي أَعْلَمُ غَيْبَ السَّمَاوَاتِ وَالْأَرْضِ وَأَعْلَمُ مَا تُبْدُونَ وَمَا كُنْتُمْ تَكْتُمُونَ * وَإِذْ قُلْنَا لِلْمَلَائِكَةِ اسْجُدُوا لِآدَمَ فَسَجَدُوا إِلَّا إِبْلِيسَ أَبَى وَاسْتَكْبَرَ وَكَانَ مِنَ الْكَافِرِينَ**

*Al-Baqara (30-34)*[12]

{Xili uu ku yiri Allah Malaa’igta “anigu waxaan dhulka gaynayaa wakiil” ayna ku yiraahdeen ‘ma waxaad gaynaysaa dhulka cid fasahaadisa oo dhiig ku daadisa anaguna adiga ayaan kuu xamdi naqnaa kuna qadarinaa’ oo uu yiri Eebe “waxaan ogahay wax aydaan ogayn”. Wuxuu baray (Allah) aadam magacyada oo dhan kadibna wuxuu u bandhigay Malaaa’igta wuxuu ku yiri “iiga warama magacyada kuwan haddii aad run sheegaysaan”. Waxay dhaheen (Malaa’igtii) ‘adiga ayaa xumo oo dhan ka dhawran ma lihin aqoon aan ka ahayn tii aad na bartay adiga ayaana ah aqoon iyo xikmad badane’. Wuxuu yiri (Allaah) “aadamoow u sheeg magacyadooda, markii uu aadan u sheegay magacyadooda ayuu yiri (Allaah) miyaanan idinku oran waxaan ogahay waxa-qarsoon (qeybka) ee cirarka iyo dhulka waxaana ogahay waxa aad muujinaysaan iyo waxa aad qarinaysaan”. Xili aan ku niri Malaa’igta u sujuuda Aadam, ayna u sujuudeen marka laga reebo Ibliis oo diiday isna weyneeyay kana mid noqday kuwa gaaloobay}.[13]

---

[11] Kadayifci-Orrelana, 25-26.
[12] http://ibtra.com/pdf/journal/v6_n1_article3.pdf
[13] Sahih International (http://quran.com/2/30-34)

**Xaq-soor:** Sida dhaqank Islaamku yahay, xaqsoorku ama caddaaladdu wuxu asaas u tahay dhidiba u taagidda nabadda. Xaq-soorku waa baahi cid walba ay qabto, sidaa darteed waxaa lagama maarmaan in dadka Islaamka ahi ay dhawraan cadaaladda iyo xaq-soorka. Ma aha oo kaliya in lala dagaalamo cadaalad-daro/xaq-soor la'aan ee waxaa lagama maarmaan ah in si dhab lagu hawlgalo sidii loo heli lahaa xaq-soor dhaqaale iyo mid bulshada dhexdeeda ah. Qur'aanka Kariimka ah wax badan ayuu ku boorinayaa dadka in ay xaq-soorka ama caddaaladda dhawraan sida ku cad ayaadaha soo socda:

(يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ كُونُواْ قَوَّٰمِينَ بِٱلْقِسْطِ شُهَدَآءَ لِلَّهِ وَلَوْ عَلَىٰٓ أَنفُسِكُمْ أَوِ ٱلْوَٰلِدَيْنِ وَٱلْأَقْرَبِينَ)

An-Nisaa (135)

"Kuwii Eebe iyo Rasuulkiisa rumeeyayoow ahaada kuwo ku adag/ku taagan xaq-soorka, maragna u ah Allah, xataa haddii arinku taabanayo naftiina, waalidkiin ama ehelkiina" Annisaa (135)

**(لقد أرسلنا رسلنا بالبينات وأنزلنا معهم الكتاب والميزان ليقوم الناس بالقسط)**

Al-Xadiid (25)

"Waxaan rusushayda la dirnay caddaymo, waxaanu ku dajinay kutub iyo miisaan si ay dadka ugu xaq-sooraan" – Al-Xadiid (25).

**(إن الله يأمر بالعدل والإحسان وإيتاء ذي القربى)**

*An-naxal (90)*[14]

**Is-cafin:** Qur'aanku wuxuu in badan ka hadlay sida samaaxaadu/is-cafintu ay uga wanaagsan tahay aargoosiga isla markaana ay u tahay dhaqan suuban. Qur'aanku wuxuu ugu baqaayaa dadka Muslimka ah in ay is-cafiyaan isuna tanaasulaan si ay u heshiiyaan. Sida uu xusay Kadayifci-Orellana, "Qur'aanku wuxuu dhiirigalinayaa kalgacalka wuxuu reebayaa nacaybka wuxuuna dadka kula dardaarmayaa in ay caradooda xakameeyaan marka ay xanaaqsanyihiin isna cafiyaan.

**(وجزاؤاسيئة سيئة مثلها فمن عفا واصلح فاجره على الله انه لايحب الظالمين)**

*Ash-shuraa (40)*

"Xumo, xumo ayaa lagu gudaa, qofkiise iska c1afiya lana heshiiya abaalkiisa Allah ayuu ahaaday, Allahna ma jecla kuwa xad-gudba" – Ash-shuraa (40).

Nabigeena Maxamed NNKH waxaa la faray inuu u wax cafiyo, wanaagana dadka faro:

**{خُذِ الْعَفْوَ وَأْمُرْ بِالْعُرْفِ وَأَعْرِضْ عَنِ الْجَاهِلِينَ}**

*Al-Acraaf (199)*[15]

[14] Ibid, 22-23.
[15] Kadayifci-Orrelana, 23-24.

“Cafiska qaado, samaha far, kana jeeso kuwo aqoonta daran” Al-Acraaf (199).

**Wakiil iyo Waajibka Bulsho:** sida aragtida Islaamku qabto, Eebe dadka wuxuu ka dhigay wakiiladiisa dhulka, sidaa darteed qof walba oo dunida saaran waa wakiil Eebe wuxuuna mas’uul ka yahay in uu dhawro nidaamka iyo kala-danbaynta, isla markaana uu nabad iyo heshiis kula nolaado dhammaan khalqiga Eebe.

(وَإِذْ قَالَ رَبُّكَ لِلْمَلَائِكَةِ إِنِّي جَاعِلٌ فِي الْأَرْضِ خَلِيفَةً)

Al-Baqara (30)[16]

“Xilli uu Allah ku yiri Malaa’igta dhulka waxaan ka yeelayaa/ku beerayaa wakiil” Al-Baqara (30)

**Arrimo kale oo Islamku qabo:** sida ku faahfaahsan maqaal aad u lafaguraya Islamka iyo Nabadaynta, kaas oo ay isku dubariddey Machadka Salam, waxaa kaloo jira qiyam iyo mabaa’di kale oo Islaami ah kuwaasi oo sare u qaadaya kalgacalka dadka dhexdiisa, isu-dhibrinta, samafalka, aqoonta, xoojinta doorka bulshada, xurmada iyo dhawrsoonaanta nolosha aadamaha, sinnaanta, nabadda iyo wada-noolaanshaha, hal-abuurka, dulqaadka, is-kaashiga iyo isla-jirka, kawada-qeybgalka, kala-duwanaanshaha iyo midnimada.[17]

## Dib-u-heshiisiin

Dib-u-heshiisiin waa hanaan dib loogu soo celinayo nabad, heshiis iyo xiriir bulsho oo ka dhaxeeya laba qof/kooxood oo khilaaf dhexmaray. Iyada oo loo marayo dhexdhexaadin iyo u kala-dabqaadid waxaa suurtagal ah in dib-u-heshiisiintu ay noqoto mid guulaysata. Inta badan waxaa la dhexdhexaadiyaa dadka khilaafka tiir-dhexaadka u ah marka ay muujiyaan isu-tanaasul iyo dulqaad isla markaana ay ogolyihiin wada-nolaanshaha.

Marka laga hadlayo xaalada Puntland, dib-u-heshiisiintu waxay u qeybsantaa sida hoos ku xusan:

- Dib-u-heshiisiin Siyaasadeed – inta badan waxaa ku lug leh siyaasiyiinta, odayaasha dhaqanka iyo bulshada rayidka ah – Tusaale: Murankii dastuuriga ahaa ee ka dhacay Puntland 2001
- Dib-u-heshiisiin Bulsho – waxaa ku leg leh hoggaanka bulshada, shakhsiyaad caan ka ah bulshada dhexdeeda iyo bulshada rayidka ah oo ay ku jiraan ururada aan dawliga ahayn ee maxaliga ah iyo kuwa caalamiga ah (Tusaale: Dib-u-heshiisiintii Cadaado ee 2007 iyo tii Rako ee 2012).

---

[16] Salam: Institute for Peace and Justice, Muslim Peacebuilding Actors in the Balkans, Horn of Africa and the Great Lakes Regions, May 23, 2005, 8.

[17] Ibid, 24.

## Amniga iyo Sarraynta Sharciga

### Qeexitaanka Amniga Qaranka

Amniga qaranka waxaa lagu qeexi karaa tallaabooyinka ay dawladi u qaado sidii ay u ilaalin lahayd jiritaankeeda, amniga iyo difaaca dadkeeda iyo danaheeda. Marka laga hadlayo xalaada Puntland, amniga qaranka waxaa soo galaya ciidamada qalabka sida, u-diyaargorowka xaaladdaha deg-deg ah, soo-kabashada, kabaayaasa qaranka , ka-hortagga halisaha amni ee gudaha iyo dibadda, iyo taabbagalinta sharciga iyo nidaamka iyada oo la hawlgalinayo ciidama booliiska, ciidama qalabka sida iyo waaxyaha danbi-baarista.

### Amniga Bulshada

Waxaa loola jeedaa in dadku aanay qabin wax cabsi ah, ayna awood u leeyihiin in ay dajistaan hanaankii ay dhidibada ugu adkayn lahaayeen nabadda.

### U-hoggaansanka Sharciga Dimuqraadiyada ku Dhisan

U-hoggaansanka Sharciga ee dimuqraadiyada ku dhisan waxaa gundhig u ah in hanaanka dawladnimo lagu dhaqo xeerar ay dadku ku qanacsanyihiin. Waa qaab hubinayaa in awoodaha dawladeed aan lagu takrifalin isla markaan muwaadiniintu ay galangal u leeyihiin dajinta xeerarka maaraynaya noloshooda. “U-hoggaansanka Sharcigu waa in sare loo hubiyaa awoodaha siyaasadeed ee loo adeegsanayo dadka iyo sida ay wax ugu dhimayaan xuquuqda dadka” haddii aysan jirin xeerar iyo qawaaniin iyo garsoor maaraynayaa awoodaha dawladda markaasi way adagtahay in dimuqraadiyadu tis qaado”.

Sida uu uu Xeel-dheere ku takhsusay arrimahaas, Rachel Kleinfeld Belton, uu sheegay shan mabda’ ayaa asaas u ah isku xukunka nidaamka dimuraadiga ah:

- Xukuumad sharciga una hooggaansan waxna ku xukunta;
- Dadka oo dhan oo sharciga hortiisa u siman (oon cidina maamuus gaar ah helin)
- Ka hirgelinta sharciga iyo kala dambaynta bulshada dhexdeeda;
- Caddaladda oo sida xaq ah loo hirgeliyo ama loo fuliyo;
- Xuquuqda aadanaha oo la dhawro.

Waxa intaas oo dhan ku hirgeli karaan in ay jiraan aaladaha lagu meel-mariyo sida Dastuurka, Garsoor madax banana, saraakiil police oo loo carbiyey, sidaas ayuu ku jiri karaa maamul dimuqraadi ah oo la isku xukumo.[18]

[18] Democracy Web: Comparative Studies in Freedom, Rule of Law: Essential Principles (http://www.democracyweb.org/rule/principles.php)

### Aragtiga Amni ee Puntland

Puntland waxa ay higsanaysaa in ay noqoto hooy nabad iyo amaan ah, isla markaana dadkeedu ay ku naaloodaan barwaaqo, nabadgalyo buuxda, dimuqraadiyad ayna helaan xushmad iyo xuquuqda bini'aadaninmo ayna gaadho horumar bulsho oo joogta ah kuna dhisan mabaa'di iyo qiyam la wadaago. Waxay kaloo Puntland ku taamaysaa in shacabkeedu helo xoriyad buuxda iyo dhamaan xuquuqaha kale oo ku xusan Dastuurka kuwaasi oo aan ka hor-imanayn mabaa'dida shareecada Islaamka.

## Su'aalaha Wadahadalka, Hawlaha iyo Filimada

### Su'aalaha wada-hadalka

- Maxaynu ugu baahanahay nabad?
- Nabaddu maxay kaaga dhigan tahay?
- Waa maxay farqiga u dhexeeya nabadayn iyo dib-u-heshiisiin?
- Sidee dib-u-heshiisiin uga abuuri kartaa fasalkaaga/dugsigaaga?
- Waa maxay doorka dhalinyarada ee :
    - Ka-hortaga khilaafka
    - Nabadaynta
- Maxay Muhiim kuugu tahay nabaddu?

### Hawlaha

#### Hawl: Geedka Khilaafka[19]

Geedkan waxaa loo adeegsadaa in si muqaal ah loo soo bandhigo khilaafka. Wuxuu tuusaalaynayaa kuwa doonayaa in ay xaliyaan khilaafkooda iyo kuwa doonayaa in ay dhexdhexaadiyaan kooxo is-haya.

Si kooban hadii loo dhigo, geedka khilaafku wuxuu muujinayaa qaab dhismeedka khilaafka iyo duruufaha is-bedbedalaya ee khilaafka. Waxaa kale oo uu si qeexan u-lafagurayaa dhamaan arimaha la xiriira khilaafka wuxuuna gacan ka gaysanayaa:

- In la fahmo sababaha iyo saamaynta khilaafka
- Wuxuu lafagurayaa sababaha gundhiga u ah khilaafka ee dahsoon ama qarsoon
- Wuxuu ka caawinayaa kooxdu in ay isla garato halka sartu ka qurantay
- Wuxuu ka caawinayaa kooxda in ay isku raacaan hanaankii ay u wajihi lahaayeen xalinta khilaafka

[19] Adapted from *Working With Conflict: Skills and Strategies for Action*. Fisher et al. Zed Books, 2000 {Waxaa laga soo xigtay Buuga la yiraahdo "La -Tacaalidda Khilaafka: Xirfado iyo Istraatiijiyado lagu Hawlgalayo". Fisher et al. Zed Books, 2000}


- Wuxuu ka caawinayaa dhexdhexaadiyeyaasha in ay si qoto-dheer u baaran saamaynta iyo waxyeeladda khilaafka
- Wuxuu ka caawinayaa kooxda in ay darsaan arimaha muhiimka ah ee dhibaatadu salka ku hayso

**Layli: Geedka Khilaafka**

**Ujeeddo: i**n wax badan laga ogaado sababaha, ubucda iyo raadadka khilaafka.
**Agabka:** Warqadaha flipchartka, qalin marker ah iyo sawirka geedka khilaafka.
Baruhu wuxuu ka hadlayaa farqiga u dhexeeya sababaha keena khilaafka, halka gundhiga u ah iyo raadadka iyo saamaynta uu ka tago khilaafku, isagoo tusaale usoo qaadanaya mid ka mid ah xaaladaha ka jira Soomaaliya si uu u muujiyo saddex-da arimood iyo sida ay isugu xiran yihiin (sababaha, duruufaha hurinaya khilaafka iyo natiijada ka dhalanta khilaafka).

Intaa kadib ardayda waxaa loo qeybinayaa kooxo. Koox waliba waxaa laga codsanayaa in ay doortaan mid ka mid ah khilaafyada ka jira Soomaaliya oo ay u wacaalo hayaan. Ka dalbo ardayda in ay ka fakaraan sida dhalintu uga qeybqaadatay khilaafka ama ay saamaynta uu ugu yeeshay khilaafku. Waxaa haboon in baruhu ardayda siiyo tusaalayaal uu ku qoro sabbuurada si ay u kala xushaan.

Ardayda waxaa laga doonayaa in ay sawir ahaan ku muujiyaan khilaafka ay ka hadleen iyaga oo adeegsanaya geedka khilaafka kuna muujinaya duruufaha ku xeeran khilaafka, sababaha dhabta ah ee uu salka ku hayo iyo raadka u reebay khilaafku. Intaa kadib, koox waliba waxay soo bandhigaysaa geedka khilaafka ee ay sawirtay si looga wada hadlo dhamaan ardayda fasalka.



## Hawl: Sawir ay tahay in la dheegto lagana wadahadlo



*Sawirka X – Madal-dhaqaeed lagaga wada-hadlayo xoojinta nabadda - Tuulo Jaalle, Gobolka Mudug*

- Maxaa ka aragtaa sawirkan? Meeshu ma suuqbaa mise waa kulan?
- Maxay tahay ahmiyadda kulankan?
- Maxay noqon karaan arimaha laga wada-hadlayo? Dib-u-heshiisiin laba kooxood/laba qabiil/laba bulsho?
- Maxay dadka reer miyiga/tuulada ahi u yeeshaan kulankan oo kale?
- Qaabkee u abaabuli lahayd kulamo bulsho oo ka dhaca dugsigaaga?

## Hawl: Maahmaahyo iyo gabayo ku saabsan nabadda

| No: | NABADDA |
|---|---|
| 1 | Belaayo ka hortag mooyee, ka dabatag ma laha. |
| 2 | Colaadi yaryareysi ma laha. |
| 3 | Dhagarqabe dhulkaa u dhaqdhaqaaqa. |
| 4 | Markii ceelalyo heshiisaa xooluhu biyo cabaan |
| 5 | Dagaal wiilbaa ku dhintee wiil kuma dhasho. |
| 6 | Nin gardarani ma guuleysto. |
| 7 | Dab munaafaq shiday muumin baa ku gubta. |

| | |
|---|---|
| 8 | Rag- Xumaato kasta ku sameeyayoo, Wallaalow wuxuu ku dhaamo garan waayey.<br>Maxaad u malaynaysaa in ay ku kaliftay in uu sidan u dhigo hadalka?<br><br>Ma kula tahay in uu is-dhiibay?<br><br>Waligaa ma maqashay beel beel ka guulaysatay? Haddii aan la kala guulaysanayn maxaa loo dagaalamayaa? |

**Su'aalo guud oo u baahan wadahadal**

*Maahmaahyadani maxay ka macno yihiin? Muxuu yahay macnaha dhabta ah iyo nuxurka/ujeedda maahmaayadan? Maxay inoo sheeganayaan?*

*Goorma ayaa la adeegsadaa yaase loo adeegsadaa (yaa yiri maahmaahyadan yuuse ula jeeday/lahadlayay)? Tusaale bixi.*

*Maahmaahyadan maxaa kale oo loogu yeeri karaa (murti maldahan)? Maxay tahay sababta ay u kala duwan yihiin sida loo yiraahdo ama loo dhigo maahmaahda iyo ujeedda dhabta ah ee loola jeedo?*

*Goorma ayay munaasib tahay in la adeegsado? Maxayse ku baqaayaan ama dardaar-werinayaan maahmaahyadani?*

*Inta badan qofka lagu yiraahdo dheg ma u dhigaa? Haddii ay jawaabtu maya tahay, qofkaasi muxuu la kulmaa dibse maka garwaaqsadaa? Qofkii ku yirise sidee uga fal-celiyaa?*

**Nabadda**

Rag gogoshii waa nabad

Dhagar-qabe dhulkaa u dhaq-dhaqaaqa

Sow godobi surinkaad martaba sabab qarsoon maah?

## Filimo

### Heshiiskii Nabadda ee Buurtinle (2008)

**Sharaxaad:** Filimkani wuxuu muujinayaa geedi-socodka dib-u-heshiisiin dhexmaratay laba jifo oo ka tirsan beesha Harti oo kala ah Cumar Maxamuud oo Majeerteen ah iyo Bah Hararsame oo Dhulbahante ah sanaddii 2007.
respectively in 2007.

**Su'aalaha/hawlaha weheliya filimka:**

- Muxuu muujinayaa ama gudbinayaa filimku?
- Maxaad ka fahantay – sideese kuu taabtay ama kuu dareengaliyay filimku?
- Maxay ahayd qeybta ugu adag dib-u-heshiisiinta aad ka aragtay filimka?
- Maxay tahay sababta odayaashu ugu baaqayaan nabadda? Dhalintuna ugu baaqi wayday?
- Maxaad u malaynaysaa in dib-u-heshiisiintani ay muhiim u ahayd? Maxayse lama huraan u ahayd in dhinacyadu ay gaaraan heshiis nabaddeed iyaga oo dhinac iska dhigaya wax walba oo dhexmaray iyo khasaare walba oo kala gaaray?
- Sidee ayay colaadaha qabaliga ah iyo dib-u-heshiisiintu saameyn ugu yeeshaan dhalinyarada/ardayda kasoo jeeda dhinacyada dirirtu dhexmartay?
- Muxuu ahaa doorka haweenka intii ay socotay dib-u-heshiisiintu?
- Ma tageersantahay caado dhaqameedka Godob-tirka?
    - o Ardaydu ha qoreen aragtidooda ku aadan godob-tirka haddii ay taageersan yihiin iyo haddii kalaba. Waxaa kale oo arinta godob-tirka laga yeelan karaa dood dhexmarta kuwa taageersan iyo kuwa diidan.

### Fariimaha Nabadda ee Haweenka (Dib-u-heshiisiintii Rako – 2012)

**Sharaxaad:** Filimkani wuxuu si kooban usoo bandhigayaa doorka haweenku ay ka cayaareen dib-u-heshiisiintii ka dhacday Degmada Rako oo la dhexdhigay laba jifi oo kawada tirsan beesha Majeerteen oo kala ah Cali Saleebaan iyo Ugaar Saleebaan sanaddii 2012.

Dhaqanka Soomaaliyeed ee soo jireenka ah, haweenka, caruurta, waayeelka, culimada iyo isimada waxaa loo yaqaanay "Biri-ma-geydo" waxaana reebanayd in la beegsado ama la waxyeelo marka ay socdaan colaaduhu.

Xaaladu maanta sidaa waa ay ka duwan tahay, haweenka waa la beegsadaa, waa la dilaa, waa la dhawacaa, waa la argagax-geliyaa iyada oo lagu hor dilayo ragoodii ama caruurtoodii, waa la barakiciyaa waxayna si joogta ah ula kulmaan xad-gudub

iyo faquuqid madaama ay u dhaxaan rag kasoo jeeda beesha diritu kala dhaxayso beesha ay ka dhalatay.

Si kastaba ha ahaatee, intii ay socotay dib-u-heshiisiinta labada beelood ee walaalaha ah (Disembar 2011 ilaa Abriil 2012) haween kasoo jeeda laba dhinac ayaa door muhiim ah ka qaatay nabadaynta. Waxay si joogta ah isu weydaarsanayeen dhanbaalo ku baaqaya wada-hadal iyo dib-u-heshiisiin aan shardi ku xirnayn si heshiis nabadeed loo gaaro. Dareenkooda ayay ku cabiriyeen qabab kala duwan sida geeraaro, buraanbur iyo fariimo nabadeed oo ay u tabinayeen waxgaradka labada beelood.

**Su'aalo:**

- Maxaad ka baratay filimkam? Maxaase taabtay dareenkaaga ama kusoo jiitay?
- Maxay dumarku kaga hadleen sugaantooda [filimka dib u daar kadibna fasalka u qeybi 4 kooxood, koox walbana sii warqadaha flip chartiga iyo qalin marker. U sheeg kooxaha in ay si degan u dhagaystaan una fahmaan fariimaha ay dumarku dirayaan. Ka dalbo in ay qoraan geeraarka/buraanburka dumarku is weydarsanayaan, ujeeddada ka danbeysa iyo waxa ay la tahay dumarku inuu ku kalifay in ay isu tabiyaan fariimahan.
- Dhaqan ahaan haweenku wax door ah kuma laha colaadaha iyo wada-hadalada nabadda; maxay haddaba kula tahay in loo beegsaday ama loo wax yeeleeyay? Dhaqankuse muxuu ka qabaa marka arimahan oo kale ay dhacaan oo dumarka la wax yeeleeyo?
- Maxay kula tahay dumarka ku abtirsada dhinacyada dirirtu ka dhaxayso in ay u fahansanyihiin cawaaqibka dhaqan-dhaqaale ee colaaduhu leeyihiin sidaa darteena ay ugu baqaayaan nabad ka hor inta aan cidiba ka hadlin nabadaynta? Dumarku waxay door lixaad leh ka ciyaareen geed-socodkii nabadda, waxay qeyb ka ahaayeen ergada iyo wada-xaajooyada, maxay haddaba arintani muhiim u tahay? Dumarku yay ku tirsan yihiin ma beesha ay u dhasheen mise beesha ay u dhaxaan?
- Maxay tahay kaalinta iyo faa'iidada sugaanta xiliyadan adag oo kale?
- Dib-u-heshiisiinta Rako maxay kaga duwan tahay dib-u-heshiisiintii Buurtinle? (su'aashan waxaa loo bandhigi karaa ardayda haddii ay daawadeen filimka ka hadlaya heshiiskii nabadda ee Buurtinle).

### Filimka Ol'olaha La Dagaalanka Burcad-badeeda (2012)

**Sharaxaad:** Filimkani wuxuu gudbinayaa isla markaana dareensiinayaa dadweynaha halista iyo dhibaatada burdac-badeednimadu ay ku yeelatay nolosha Soomaalida.

Wuxuu kaloo daahfurayaa sida bulshooyinka ku dhaqan xeebaha iyo burcad-badeeda qudhooda aysan xog-ogaal ugu ahayn sida burcad-badeednimadu u saamaysay amaanka marinada biyaha iyo guud ahaan dhaqaalaha caalamka. Waxay kaloo aysan u tooghayn dadaalada caalamiga ah ee lagula dagaalamayo burcad-badeeda, qaraarada iyo xeererka laga soo saaray fal-danbiyeedkaasi iyo joogitaanka ciidamo caalami ah oo ilaalo kahaya biyaha Soomaaliya. Wuxuu kaloo filimku muujinayaa sida soomaali badan oo ku lug leh burcad-badeednimo loo qabqabtay looguna hayo in ka badan 20 dawladood oo dunida daafaheeda ah. Wuxu kaloo filimku ka koobanyahay dhanbaalo wacyi-galin ah iyo jawaabo iyo dareen ay muujiyeen bulshooyinka ku dhaqan degaano xeebaha ku teedsan oo burcad-badeedu ku xoogan tahay sida Eyl, Jarriban, Banderbeyla iyo Boosaaso.

### Su'aalo la socda filimka

- Maxay kula tahay in burcad-badeeda Soomaalida ay u dareen galiyeen quwadaha aduunka ugu weyn?
- Maxay kula tahay sababta keentay ama dhalisay burcad-badeeda Soomaalida?
- Burcad-badeednimadu sidee ayay u saamaysay ardayda/dugisyada?
- Maxaad ka xasuustaa dhaqamada xunxun ee burcad-badeedu ay usoo hoyisay bulshadeena?
- Maxaad ugu malaynaysaa in bulshooyinka ku dhaqan xeebaha ay burcad-badeedu ku xooganayd sida Eyl, Jarriiban iyo Garacad in ay xili hore isaga saari waayeen burcad-badeeda ka hawlgali jirtay degaankooda?

### Filimka Wax-soo-saarka Dhuxusha

**Sharaxaad:** Filimkani wuxuu muujinaayaa dhibaatada deegaanka ay ku reebtay gubista dhuxusha ee ka socota gobolka Sanaag. Filimku wuxuu soo bandhigayaa dhir badan oo la jaray si dhuxul looga dhigto iyo saamaynta ba'an ee ay arintaasi ku yeelatay deegaanka, xoolaha iyo nolosha dadka.

### Su'aalaha filimka

Muqaalkan naxdinta leh wuxuu gudbinayaa fariin culus oo ku filan in ay kiciso dareenka iyo damiirka dadka ee ku aadan dhibaatada ba'an iyo xaalufka dhuxul soo-saarku ku hayo deegaanka. Dadka daawanaya ayay u taal in ay go'aan iyo mawqif adag ka qaataan sidii ay uga hortagi lahaayeen muusiibadan ku habsatay deegaanka. Macallinka waxaa laga doonayaa in uu ardayda fursad labaad siiyo si ay dib ugu daawadaan filimka kadibna ay uga saamaystaan qoraal kooban oo ka caawiya ka jawaabista su'aalaha

- Filimkani muxuu kuu sheegayaa? Maxay tahay fariinta uu filimku gudbinayo?
- Maxaad ka baratay filimkan? Ma jiraa qeybo ka tirsan filimka oo dareen gaar ah ku galiyay? Haddii jawaabtu "haa" tahay, u ogoloow qeyb ka tirsan ardayda in ay soo horjoogsadaan fasalka lana wadaagaan dareenkooda.
- Maxaad u malaynaysaa in ilaalinta deegaanku ay muhiim u tahay?
- Deegaanku muxuu kaaga dhigan yahay? Dhirtu side ayay waxtar ugu leedahay nolosheena; waydii ardayda in ay sheegaan faa'iidooyinka iyo waxtarka dhirta iyo kaymaha.
- Maxay kula tahay sababta dhuxul gubistu ay uga jirto Puntland? Maxayse dadka dhuxusha gubaya ay ka helayaan?
- Ma ogtahay wax sharciyo ah oo mamnuucaya gubista iyo dhoofinta dhuxusha?
- Waydii ardayda in ay maleeyaan isla markaana ka hadlaan saamaynta ba'an ee dhuxul gubista iyo xaalufka deegaanka.

### Haweenka Soomaaliyeed: Awood u Heellan Nabadda (2012)

**Sharaxaad:** Filimkani wuxuu muujinayaa kaalinta haweenka Soomaaliyeed ay kaga jiraan dhisamaha nabadda, bari-taarka iyo jiritaanka qoysaska, hogaaminta iyo dhisamaha dawladnimo. Filimku wuxuu u kuurgalayaa nolosha tiro haween ah oo ku kala nool gobolada dhexe ee Soomaaliya, Puntland iyo Somaliland si uu soo bandhigo kaalimaha ay haweenku kaga jiraan nabadaynta, nolosha qoysaska iyo dhismaha dawladnimo.

#### Su'aalaha

- Maxaad ka fahamtey filmkan? Maxay tahay farrinta uu gudbinayo?
- Maxaad ka baratay filmkan? Ma murgootey marka aad maqashay farriinta? La qaybso saaxiibada waxa ku murugo geliyey.
- Dumarka Somaliyeed maxay bulshada ka yihiin? Kaalintooda iyo maqaamkoodu ma isbeddelaa xilliga colaadu jirto?
- Ka dooda xiriirka ka dhexeeya gabdhaha/dumarka iyo raga? Ha qeexaan ardaydu mid walba kaalinta uu kaga jiro hawlaha bulshada?

### Filimka Ururka Dhalinyarada Soomaaliyeed (SYL) – 2009

**Sharaxaad:** Filimkani waxaa u muujinaya sida tiro dhalinyaro Soomaaliyeed oo midaysan lehna hal ujeeddo ay uga dhabeeyeen in ay horseedaan xorinimada Soomaaliya iyaga oo halgankooda bilaabay 1943. Filimkani wuxuu soo jiitay dareenka dhalinyaro badan wuxuuna dhaliyay doodo xiiso badan oo ku saabsan sida dhalinyarada manta ay is-beddel dhab ah ugu keeni karaan wadankooda hooyo ee ay raagaadiyeen colaadaha iyo kala-qoqobka siyaasadeed.

**Su'aalaha**

Maalin ka hor in aan filmkan la soo bandhigin, ardayda waa in loo diro in baaritaan ku soo sameeyaan taariikhdii SYL xorriyadda ka hor iyo ka dibba. Ha soo heleen sawirrada asaasayaashi Xisbiga SYL macyadoodana ha ku soo qoreen.

- Maxaad ka baratay filmkan? Wax cusub ma kugu kordhiyey?
- Maxaa loo halgamayey?
- Maxa dhallintan midayey? Maxay ku midoobeen? Maxay u midoobeen?
- Goorma ayaa la asaasay SYL? Imisa qof ayaa asaasay, kuwese ahaayeen, magacaw?
- Ma guulaystey halkoodii? Maxay ahayd natiijadii laga gaarey? Somalida maantay maxay raad ah oo xusuustooda ku reebtay?
- Is-barbar dhig dhallinta maantay iyo kuwii SYL maxay ku kala duwan yihiin?
- Goorma ayaa xorriyaddi helnay?
- Maxay ahaayeen magacyada madaxweynihii, ra'isalwasaarihii iyo ra'isul barlamaankii ugu horrayey?

# Cutubka 3: Dimuqraaddiyadda iyo Maamul-Baahinta

## Dimuqraaddiyadda

Geedi-socodka dimuqraadiyadda Puntland waa saan-qaaday, hadalhayntiisa iyo ka doodistiisuba waa waxa laga dareemaya dhammaan qaybaha kala duwan ee bulshada iyo mandiqadda gebi ahaan. Tababarkan ujeedadiisu waa in uu u jawaab ka bixiyo baahida weeyn oo loo qabo in laga dodo lana fahmo dhammaan arrimaha la xiriira; siiba dhallinyarada iyo ardaydu in ay dhuuxaan aqoonta guud ee dimuqraadiyadda. Tababarku wuxu ardayda ku soo dabbaalaya in ay ka qaybgalaan doodaha dimuqraadiyadda xag macne ahaan (Theory); sida macneheeda, sooyaalkeeda, ujeedadeeda, mabaadii'deeda, ku dhaqankeeda bulsho; ama xag fulin (Practice); sida noocyadeeda, xisbiyada siyaasadeed, doorashooyinka, barlamaanka, dawladda.

Tababbarkan waxa uu si gaar ah diiradda u saarayaa in uu jawaabo ka baxsho su'aalaha faraha badan ee ay ardayda, iyo guud ahaan dhallinyaradu, is weydiinayaan.

Ujeeddada guud ee tababarkani waa in lagu wax lagu baro muwadiniinta iyo hoggaamiyeyaasha mustaqbalka. Ardayda waxa lagu dhiirigelinaya in ay horumariyaan fahamkooda guud iyaga oo samaynaya baaritaano iyo aqoonkororsi.

## Sida loo Adeegsanayo Cutubkan

cutubakani wuxu macallimiinta ku hubaynayaa aqoon ay ku fududayaan doodaha ku saabsan mawduucyada Dimuqraadiyadda iyo maamul maxalliga ah. Wuxu kale xog dheeraad ah ka siinaya macallimiinta dhammaan arrimaha la xiriira mawduucyada.
Cutubku wuxu ku bilaabanaya in uu xog hor-dhac ah ka siiyo macallinka/fududayaha waxa ay dooddu ka kooban tahay. Taas oo macallinka u noqoneysa meel uu ka bilaabo doodda. Waxaase lagu dhiirigelinayaa macallinka in uu baaritaan dheeraad ah samayo ama u yeerto cid waayo-aragnimo u leh arrimaha laga doodadayo ama laga wadahadlayo.

Qaybtan soo socota waxay fududayaha ama macallinka siiyeysaa aalado uu ardayda ku hawlgeliyo. Aaladahaas waxa loo adeegsan kara gaar-gaar ama si wadajir ah, waana kuwa soo socda:

- **Su'aalaha lagu bilaababayo.** Macallimiintu waxay ku kordhin karaan su'aalaha qorshaysan kuwo la xiriira doodda ama xaaladaha iyo ammuraha markaas taagan ku saabsan.
- **Talo-soo-jeedinta hawl** ardayda ka caawisa/taageerta in ay si dhab ah uga fikiraan kuna soo dabbaasha mawduuca.
- **Sawirro la xiriira mawaadiicda.** Macallinku/fududayuhu inta aanhawsha la guda gelin ayuu u soo bandhigi kara ardayda sawir isaga oo waydiinya su'aalaha ah – maxaad ku aragtaa/kaaga muuqda sawirka? Sidee ula xiriira mawduuca laga doodayo, markaas ka dibna uga gudbo su'aalaha kale. Hawshaas waxa lo qaban karaa kooxo koob-kooban ama iyaga oo isu dhan.
- **Maahmahyo ama gabayo mawduuca la xiriira.** Su'aalo bilow ah ayaa loo soo jeedinaya ardayda kuwaas oo la xiriira mawduuca. Waxa kale oo loo baahan yahay in ardayda lagu dhiirrigeliyo in ay curiyaan gabayo mawduuca la xiriira.
- **Liiska Aflaam Dukumentari ah oo Mawduuca la Xiriira.** Suurto gala ma ahan in macallin walbaa uu awood u leeyahay in uu soo bandhigo aflaam la xiriira mawduuca. Balse waxa Xarunta Horumarinta Cilmi-baarista Puntland diyaarisay tiro aflaam ah oo isla cutubkan dhammaadkiisa ku taxan iyaga oo ay weheliyaan su'aalaha la xiriira iyo soo jeedimo kaleba**.**

## Dimuqraaddiyadda

### Waa maxay dimuqraadiyadi

Ereyga dimuqraadiyad asalkiisu waa Griig "Domokratia", kaas oo ka kooban labo erey oo kala ah "Demos" iyo "Karatos" oo micnohoodu kala yahay "dad" iyo " Awood"; labada erey marka la isu geeyo waxa macnohoodu noqonaya "Awoodda Dadka". Ereyga Democracy waa mid fac weyn wuxuuna jira in ka badan 2500 oo sano.

#### Waa maxay kaalinta muwaaddinka, marka la eego dimuqraaddiyadda?

Dimuqraaddiyaddu waa hab u oggolaanaya muwaaddinka in uu cod ku yeesho bulshada dhexdeeda, si uu uga qayb-galo go'aannada saldhigga u ah nolosha. Waxa uu u oggolaadaa muwaaddin kasta (oo buuxsha shuruudaha doorashooyinka) in uu si toosan u doorto wakiillo, sidaa darteedna saameyn ku yeesho maamulka dalka. Marka la eego nidaamka Dimuqraaddiga ah, dhismaha dawlad waxa saldhig u ah doorasho dadku ka wada qayb-galo, halkaana ay ka dhalato dawlad dalka ku maamusha si waafaqsan rabitaanka dadka.

### Sidee ayey u shaqeysaa dimuqraaddiyaddu?

Dimuqraaddiyaddu waxa ay ku dhisan tahay talada dadka inta badan (majority), iyada oo la xurmeynayo xuquuqda dadka inta laga tiro badan yahay (minority), xorriyadaha (xorriyadda ra'yiga, xorriyadda saxaafadda, xoriyadda ka mid noqoshada ururka …) iyo xuquuqaha iyo weliba maamul wanaagga, axsaabta siyaasadeed, doorashooyin xor ah, baahinta awoodda maamulka iyo la-xisaabtanka (dabagalka) hay'adaha qaranka (checks and balances). Xoriyadaha kor ku xusan waxay tusinayaan in dadku xaq u leeyahay in ay cabiraan rayi'gooda (oo ay ku jirto qaab qoraal/faafin ah) isla markaana ay kulmi karaan si xoriyadi ku jirto iyaga oo faragalin kala kulmayn dawladooda. Xorriyadahaasi waxay dadka u suurtogeliyaan in ay awood u helaan ay ugu codayaan danohooda iyo waxa ay aaminsan yihiin.

### Dimuqraaddiyaddu waxa ay la xiriirtaa fikradaha iyo mabaadii'da hoos ku qoran:

Xuquuqda Aadanaha, Xorriyadaha, Xorriyadda Ra'yadka/fikirka, Xuquuqda Qoraalka, Wajiyo Badnaanta Siyaasadda, Doorashooyin lagu Tartamo oo Xilliyaysan, Talada dadka inta badan iyo Xuquuqda inta laga badan yahay, Tartan siyaasadeed, Mucaarad siyaasadeed, Awoodda siyaasadeed oo lala kala wareego, Isu tanaasul iyo shaqaaqo la'aan, Kala Duwidda Awoodaha, La xisaabtan, ururro Rayad ah oo madax bannaan, saxaafad xor ah iwm.

### Nidaamka dimuqraaddiga ah iyo kaan ahayn

*Maxay yihiin nocyada dimuqraadiga ahi?*

**Dimuqraadiyadda Tooska ah:** waa nidaam ay dadku iskood isu maamulaan; waxay si toos ah uga qaybqaataan go'aan-qaadashada maamulkooda/dawladooda, si toos ah ayey u soo doortaan shruucda iyo xeerarka lagu dhaqayo intii ay ka sugi lahaayeen wakiillo iyo cid u dhexaysa. Nidaamka siyaasadeed dadku si toos ah ayey uga qaybgalaan ammuraha dawladdooda.

**Dimuqraadiyadda la is mataloama Balamentari ah :** waa nidaam muwaadiniintu ay arrimaha siyaasadeed ay si dadban uga qaybqaataan (Siiba meelaha dadku ku badan yahay) taas oo ay ku soo doortaan dad ku matala oo magacooda ku hadla ama ku go'aan qaata. Nidaamka dadban ama aan tooska ahayni waa kan loogu soo doorto cidda cadka badan hesha ama si kale loogu halbeego.

Mararka qaarkood qaybo ka mid ah dimuqraadiyadda la is matalo ayaa laga arki karaa tan toosk ah; sida aftida u qaadista dastuurka oo dadku si toos ah codkooda u dhiibtaan.

***Hay'daha Asaasiga ah ee Dimuqraadiyadda***

Hay'adaha dimuqraadiga ahi waxay samayaan qaab-dhismeedyo iyo tab looga dan leeyahay in lagu xoojiyo sharciga iyo kala dambaynta, dalna lagu maamul si loo xaqiijiyo dhex-dhexaadinta fikradaha is-maandhaafsan, danaha iyo doonista kala haabka ah.

Dimuqraadiyadda Baarlamaaniga ah – waa dimuqraadiyad loo dhan yahay oo ay dawladda soo magacaabaan wakiilo. Waxa taas ka duwan 'Dimuqraadiyadda Madaxtooyada' oo madaxweynuhu uu yahay madaxa dawladda iyo kan Xukuumadda ayna dadweynhu toos u soo doortaan.[20]

In ka mid ah dimuqraadiyadda loo dhan yahay waxa ku jiri kara waxyaabo tan kale ka mid ah sida 'Aftida' oo ay dadweynhu si toos ah codkoodu arrin u gaar ah go'aansadaan.

***Tusaale hababka aan dimuqraadiga ahayn?***

Waxa kale oo jira habab siyaasadeed iyo maamul, kuwaas oo fikrad ahaan iyo ku-dhaqan ahaanba ka duwan kuwa dimuqraaddiga, waxana ka mid ah ku dhaqanka Habka Qabiilka, Boqortooyada, Xuku-Kooxeed (Oligarchy), Keli-talisnimada, iwm.

## Dawlad & Xukuumad

### Xukuumad

Xukuumadi waa qaabka siyasadda dawladda lagu go'aamiyo laguna fuliyo. Si kale haddi loo dhigo, xukuumadi waxa lagu qeexaa in ay tahay qaab-dhimeed iyo dad loo igmaday in ay maamulaan dal.

***Maxay kala yihiin laamaha ugu waaweyn ee dawladda?***

Waxa ay kala yihiin: 1) Sharci-dejinta, 2) Fulinta, 3) Garsoorka

[20] John M. Carey, "Presidential versus Parliamentary Government," in C. Ménard & M. M. Shirley, eds., *Handbook of New Institutional Economics* (Berlin: Springer, 2005), 91.

### Muxuu ka kooban yahay Dalku?

*(Sawirro laga wada-hadlo waxaad ka heli kartaa qaybta Su'aalaha Wada-hadalka, Hawlaha iyo Filimada - Discussion Questions, Activities and Films)*

Dal waxa uu ka kooban yahay 4 qaybood oo waaweyn:

1. **Ummad:** Dhaqamada, luuqadda, iyo qabiillada ay ka kooban tahay ummad.
2. **Dhul:** Juqraafigu waa qodob kale oo lagu garto dal.
3. **Haybad Qaran:** Dal waa in uu leeyahay awood uu ku meel-mariyo nidaamka u deggan ee gudaha iyo dibeddaba.
4. **Dawlad:** Waa ururka siyaasadeed ee dalka, kaas oo meel-marsha awoodda dalka.

## Hawlaha Axsaabta Siyaasadeed iyo Kaalinta ay kaga jiraan Dimuqraaddiyadda

### Waa maxay xisbi siyaasadeed?

Sida uu qabo Buug-Sooyaalka Britanica Online, "Xisbi siyaasadeed waa koox dad ah, oo isugu jira qayb haysa xil siyaasadeed iyo qayb ah musharraxiin, dad u dooda, dad wax doorta, dadkaas oo leh magac kooxeed iyo barnaamij, isla markaana doonaya in ay hoggaanka u doortaan cid ay isku aqoonsi yihiin".[21] In kasta oo xubnaha xisbi ay kala duwan yihiin, isla markaana aanay isku aragti ahayn, xubnuhu waxa ay dadaal ugu wada jiraan in musharrixiinta ka socda xisbiga ku guuleystaan qabashada xil dawladeed.

Xisbiyadu waxa ay dhashaan marka qayb ka mid ah shacabku yeelato aragti ka duwan aragtida maamulka haya hoggaanka dalka, aragtidaas oo ku saabsan qaababka loo maareyn karo arrimaaha siyaasadda, isla markaana loo jeexi karo qorshe looga gudbi karo.

### Waa maxay danta laga leeyahay ama hawlaha uu qabto xisbi siyaasadeed?

Danta laga leeyahay xisbi siyaasadeed waxa uu ka kooban yahay qayb ama dhammaan qodobbada soo socda:

- Dismaha urur/xisbi siyaasadeed (political party organization)
- Xiriirinta iyo u-gudbinta dawladda danaha ummadda
- Ku wacyi-gelinta dadka xaaladda dalku ku sugan yahay
- Ka-qayb-gelinta dad badan arrimaha siyaasadda
- In dadku isku waafaqo talada

[21] http://www.britannica.com/EBchecked/topic/467631/political-party

- Abuurista siyaasiyiin iyo hoggaamiyeyaal xisbi
- Abuurista musharrixiin u tartama hoggaanka
- Abaabulka doorteyaal (voters) iyo tartan doorashooyin siyasadeed
- Bandhigga talooyin ka duwan nidaamka u deggan dawladda, iyo qaabab ka habboon
- Ku-guuleysi tartan doorasho iyo dhisme dawlad

## Waa maxay doorasho?

Doorasho waa hab ay ummaddu xorriyad ugu doorato nidaamka iyo hoggaamiyeyaasha ay u aragto in dantu ugu jirto.

Doorashada xorta ahi waxa ay ummadda u suurto-gelisaa in ay doorato dawladda ay dooneyso. Dimuqraaddiyadda waxa saldhig u ah doorashooyin ku dhisan caddaalad iyo xorriyad. Dimuqraaddiyaddu waxa ay ku xiran tahay muwaaddin kasta in uu iskii ku doorto cidda uu doonayo.

Ardeyda wax ka weyddii:

- ✔ Sidee baan uga qayb-galnaa dawladnimada?
  (Waxan u marnaa wakiillada aan dooraney)
- ✔ Sidee cod ugu yeelanaa shuruucda dawladdu dejiso?
  (Waxan adeegsanaa qoraallo iyo cadaadis siyaasadeed)
- ✔ Sidee u dooranaa hoggaan waafaqsan danteenna iyo waxa aan aaminsan nahay?

(Annaga oo adeegsaneyna qorshe siyaasadeed, hufnaan musharraxnimo iyo hoggaan)

## Baarlamaanka

*(Sawirro laga wada-hadlo waxaad ka heli kartaa qaybta Su'aalaha Wada-hadalka, Hawlaha iyo Filimada )*

Waa halka fadhiga u ah cidda ay soo doortaan dadka cod-bixiyeyyaasha ahi. Waa udub-dhexaadka dimuqraadiyadda oo dadka la soo doortay ay kaga doodaan kuna soo saaraan shruucda lagu maamulayo dalka.

Hawlaha baarlammanka wax aka mid ah:

- **Wakiilnimo:** Dhammaan xubnaha baarlamaanka waxa soo dooratey ummadda; iyaga ayeyna uga wakiil yihiin hawlaha dawladda.

- **Sharci dejin:** Sharci dejintu waa hawsha ugu horreysa ee Baarlamaanka.
- **Dabagalka:** Baarlamaanku waxa uu hawlaha dawladda ku sameeyaa dabagal, la-xisaabtan iyo hubin tayo.
- **Dhismo/samayn Dawladeed:** Marka ay jiraan axsaab badan, dawladda waxa soo dhisa xildhibaannada ka socda xisbiga aqlabiyadda leh iyo inta xulufada la ah.

## Habka Qabiilka iyo Kan Dimuqraaddiga

Marka ay ardadu fahamaan micnaha loola jeedo dimuqraaddiyadda iyo sida ay u shaqeyso, fududeeyahay/macallinku waa in uu u nidaamiyaa ardada in ay yeelato wada-hadal, ayaga oo xaglo kala duwan ka eegaya Habka Qabiilka, isla markaana u bar-bar dhigaya Habka Dimuqraaddiga.

### Fikradaha guud ee habka qabiilka

Habka qabiilku waa hab dhaqan-dhaqaaleed qaddiimi ah, in kasta oo dalal badan uu ka jiro illaa iyo maanta, haddana waa uu ka horreeyey dhammaan hababka dhaqan-dhaqaale ee jira. Habkan waa qaab-qoyseed la ballaarshey. Marka la eego Puntland/Somalia, dadka inta badan waxa ay ku ab-tirsadaan qabiillo, waxana dhaqan u ah xiriir tolnimo.

Habka qabiilku waa hab soo-jireen dhalsho ku dhisan; xubnaha qabiilku waxa ay wadaagaan oday ay ka soo wada farcameen.

### Waa maxay kaalinta iyo shaqada habka qabiilku?

Habka qabiilku kaalin muhiim ah ayuu kaga jiraa nolosha dadka. Waxa uu baxshaa aqoonsi, difaac, helitaanka kheyraadka (biyo iyo degaan), awood siyaasadeed iyo weliba xal-u-helidda colaadaha.

### Sidee habka qabiilku u shaqeeyaa?

*(Sawirro laga wada-hadlo waxaad ka heli kartaa qaybta Su'aalaha Wada-hadalka, Hawlaha iyo Filimada - Discussion Questions, Activities and Films)*

Nidaamka habka qabiilku wuxu waxa saldhig u ah 1) hoggaaminta Cuqaasha la caleemosaart 2) golaha wadatashiga ee Cuqaasha 3) Xeerka soo-jireenka ah. Madax-dhaqameedka ama Cuqaasha waxa lagu xushaa hab la-iska dhaxlo, Xeel-dheeri, Aqoonta sooyaalka iyo xeerarka, murtida iyo suugaanka loo adeegsado in wada noolaanshaha iyo is dhexgalka bulshada lagu hayo.

### Sidee habka qabiilku uga duwan yahay habka dimuqraaddiga?

- Xubnaha qabiilka waxa isu haya xiriir dhiig/dhalsho iyo dhaqan
- Xubnaha xisbi siyaasadeed waxa isu haya waxa ay aaminsan yihiin iyo dan
- Habka qabiilka waxa saldhig u ah xeerka (oo ah shuruuc aan la qorin), go'aanka odayaasha oo ay ansixiyaan isimada boqran
- Habka dimuqraaddiga waxa saldhig u ah dastuur, baarlamaan iyo dawlad

## Xaaladda Puntland iyo Dimuqraadiyaynta

### Ardaydu waxa ay ka wada-hadlayaan Geeddi-socodka dimuqraaddiyeynta Puntland

### Sababta iyo sida loo dhisay Puntland?

Markii ay bur-burtey dawladdii Soomaaliyeed January 1991-dii, waxa qarxay dagaallo sokeeye, dalkuna waxa uu u kala goo-go'ay qaybo ay gacanta ku hayeen qabiillo, waxana suurto-gal noqon weydey in la helo dib-u-heshiisiin qaran.

Dad fara badan oo ka soo baro-kacay koofurta iyo bartamaha Soomaaliya ayaa ku soo laabtay degaannadii ay u dhasheen ee Waqooyi Bari Soomaalia (haatan loo yaqaan Puntland).

Odayaasha, isimada, hoggaamiyeyaasha siyaasadda, saraakiisha ciidamada, shacabka, rag iyo dumarba waxa la isu kaashadey in la dhiso dawladda Puntland ee hadda jirta.

Axdigii Ku meel gaarka ahaa ee ugu horreeyey (1998-2001), Dastuurkii Ku-meel gaarka ahaa (2001-2011) iyo Dastuurka Cusub ee la ansixiyey 15 April 2012 waxa ay sheegayaan in Puntland ka tirsan tahay dalka Soomaaliya, isla markaana dhabbaha u xaareyso qaab "hoos illaa kor " ah oo loo soo dhiso Jamhuuriyad Soomaaliyeed oo Federaal ah.[22]

### Maxay yihiin heerarka kala duwan ee Geeddi Socodka Dimuqraaddiyeynta Puntland?

*(Sawirro laga wada-hadlo waxaad ka heli kartaa qaybta Su'aalaha Wada-hadalka, Hawlaha iyo Filimada - Discussion Questions, Activities and Films)*

Muddo dheer dabadeed, Puntland waxa ay hadda u gudubtey taabba-gelinta habka dimuqraaddiyadda:

[22] Puntland Development Research Center (PDRC), Puntland Note: Mapping the Foundations of Peace, November 2010, 40-41.

- Dastuurka waxa 15kii April 2012 Garowe ku ansixiyey Shirweyne ay isugu yimaadeed 480 ergey, kuwaas oo ay soo xusheen odayaasha iyo beelaha
- Guddiga Doorashada (TPEC: Transitional Puntland Electoral Commission) ayaa hawl-galay (ka dib markii ay taba-bartey hay'adda Interpeace) waxa uuna hayaa hawlaha loo xil-saaray.
- Baarlamaanku waxa uu ansixiyey, ka dibna la faafiyey, shuruucda saldhigga u ah axsaabta siyaasadeed iyo doorashooyinka.
- Waxa la bilaabay diiwaan-gelinta ururrada siyaasadeed
- Waxa la qeexay wakhtiga ay dhacayso doorashada (sannadka 2013 gudihiisa)

### Maxay yihiin caqabadaha hor taagan Geeddi-Socodka Dimuqraaddiyeynta Puntland?

Ardeydu waxa ay ka wada hadlayaan caqabadaha hoos ku qoran ee la xiriira geeddi-socodka dimuqraaddiyeynta Puntland:

- Ka-hirgelinta Puntland hab-siyaasadeed ku dhisan dimuqraaddiyad
- Habka qabiilka iyo kaalinta odayaasha dhaqanku kaga jiraan dimuqraaddiyadda
- Arrimaha la xiriira dimuqraaddiyadda iyo Diinta Islaamka

## Maamulka Maxaliga ah (Local Governance)

Qaybtani waxa hoos ugu daadegeysa ayna qeexeysaa fikradaha iyo ammuuraha la xiriira is-maamul hoosaadka ama maamulka maxalliga ah iyo weliba sida ay Puntland uga hirgeli karaan.

### Maamul-baahin

Maamul-baahini waa geedi-socod waxana loola jeedaa awoodda iyo mas'uuliyadaha ummadda, sida waxbarashada iyo caafimaadka, oo laga soo daadejiyo heer qaran, lana gaarsiiyo heer degmo. Maamul-baahintu waxa ay inta badan ku saabsan tahay in si dimuqraaddi ah loo dhiso kooxo si fir-fircoon uga qayb-qaata maamulka degaanka, isla markaana kaalin muhiim ah ka qaata qorsheynta iyo go'aan gaaridda, tusaale ahaan Golaha Degaanka.

Maamul-baahintu waxa ay noqon kartaa mid ka mid ah qaababka hoos ku qoran:

**Maamu-baahin** waa qaab maamul-baahin, taas oo saraakiisha sare ee dawladda dhexe ka hawl-galaan degmooyinka. Saraakiishaas waxa ay fuliyaan barnaamijyo heer gobol ah, waxa ayna ilaaliyaan inaan lagu xad gudbin danaha dawladda dhexe.

Awoodaha kama dambaysta ah ee dastuurka waxa iska leh dawladda dhexe oo haddii loo baahdo kala diri karta maamul-hoosaadyada. Qaabkan maamul-baahin waa kan ugu liita.

**Wakiilasho** waa qaab kale oo qoto-dheer kana mid ah qaababka maamul-baahinta, wuxuuna ku salaysan yahay in awoodaha dawladda dhexe loo wakiisho hay'addo ay korjoogtayn ku samayso dawladda dhexe lakiin aysan maamulin si buuxda, sidaa darteedna hay'adahaasi waxay leeyihiin awood go'aan qaadasho oo madaxbanaan. Qaabka wakiilashada ee maamul-baahinta waxaa tusaale u noqon kara hay'adaha dadweynaha ee qaabilsan guriyaynta, gaadiidka, waxbarashada iyo adeegyo kale.

**Baahin** (hoos-ka-dhis - kor-u-dhis) Halka qaabka wakiilashadu uu awoodo gaar ah (sida guriyaynta) uu siinayo hay'ado qeyb ahaan madaxbanaan (oo noqon karaa laamo hoose oo dawladda ah ama ay dawladdu abuurtay), Maamul-baahinta ku dhisan hanaanka hoos-ka-dhiska-kor-u-dhiska (baahin buuxda) waxa uu awoodaha dawladda dhexe u dhaadhicinayaa heerer hoose kuwaasi oo u qaabaysan sidii maamul-dagaan oo doorta madaxdiisa maxaliga ah isla markaana leh ilo-dhaqaale. Tusaale ahaan, dawladda dhexe waxay ku wareejin kartaa awoodaha bixinta adeegyada caafimaadka, ilaalinta deegaanka iyo waxbarashada dawlad gobeelyada/dawladaha hoose.[23]

## Maamul-Dawladeed

Guud ahaan, ereyga "maamul-dawladeed" waxa loola jeedaa awoodda qaybaha dawladdu ku baxshaan adeegyada muwaaddiniintu u baahan yihiin, qaab hufan oo wax-ku-ool ah.

### Maamul Wanaag

*Waxan oran karnaa 'maamul wanaag' waxa uu ku saabsan yahay dadka oo loo taliyo, lagana qayb-gesho talada.*

Qaar ka mid ah astaamaha maamul wanaagga waxa ka mid ah:

- **Ka-qaybgal:** waxa loola jeedaa awoodda dhammaan dadku kaga qayb-galo talada, tusaale ahaan, talooyinka la xiriira mudnaan-siinta qorshayaasha degmada.
- **Sarreynta Sharciga:** waxa ka mid ah jiritaanka shuruuc iyo dadka oo u

[23] "What is Decentralization?," The Online Sourcebook on Decentralization and Local Governance, http://www.ciesin.org/decentralization/English/General/Different_forms.html

hoggaansama shacriga. Arrintan waxa ay u baahan tahay ciidan amni oo aan aqoon musuq-maasuq iyo garsoor ku shaqeeya caddaalad.

- **Hufnaan:** waxa loola jeedaa dawlad si cad oo aan qarsoodi lahayn u soo bandhigta sida ay go'aannada u gaartey, isla markaana muujisa in go'aannadu yihiin kuwo ka turjumaya danta dadka.
- **Dhago-nuglaan (Responsiveness):** waxa loola jeedaa in dawladdu ka go'an tahay wax-qabad wanaagsan, una adeegin danteeda gaarka ah oo qudha.
- **Sinnaan iyo Ka-wada-qaybgal:** aarintan waxa ay ku saabsan tahay baahida dhammaan dadku u qabo dawladda, taas oo aan gaar ku ahayn inta hantida ama awoodda leh.[24]

## Maamul-Baahinta Iyo Dawladaha Hoose

### Xog Hordhac ah (Background Information)

Dawladda Puntland waxa la aasaasay 1998, waana dawlad madax-bannaan, hase yeeshee hoos iman doonta dawlad Soomaaliyeed ee Federaal ah marka la dhiso.[25] Dastuurka Puntland ee dhaqan-galey April 2012 waxa uu hoosta ka xarriiqay mudnaanta ay leedahay in Puntland laga hir-gesho nidaam dimuqraaddi ah iyo xukun dadku ka wada qayb-galo. Sidaa darteed, dastuurka Puntland waxa uu mudnaan siinyaa 'nidaamka is-maamulka' waxa uuna saarayaa Degmooyinka mas'uuliyadda ah in ay fulin karaan qorsheyaal heer qaran ah, isla markaana degsan karaan nidaamyo gaar u ah, qorsheyaal iyo barnaamijyo.

Hawsha maamul-baahintu waxa ay Puntland ka billaabatey toban sano ka hor, ayada oo dawladda Puntland dhexda u xiratey in ay awoodaha maamul iyo kuwa siyaasadeed gaarsiiso heer degmo, si loo wanaajiyo is-maamulka, hufnaanta, la-xisaabtanka, isla markaana degmooyinku yeeshaan adeegyo wanaagsan ayada oo kor loo qaadayo aqoonta iyo tayada wax-qabadkooda.

Bartamihii sannadkii 2003, dawladda Puntland waxa ay soo saartey shuruucda dawladaha hoose, taas oo qayb ka ahayd qorshaha dimuqraaddiyeynta Puntland ee xukunka loo gaarsiinayey muwaaddinka.[26] 23-dii September 2003, Baarlamaanka Puntland waxa uu ansixiyey Sharci No. 7 ee Dawladaha Hoose.

In kasta oo qorshaha maamul-baahinta la dejiyey 2003-dii, kaas oo lagu qeexay Sharciga Golaha Degaanka No. 7, dhismaha goleyaasha degaanka waxa dhab ahaan la billaabey April 2005. Degmadii ugu horreysay ee yeelata Gole Degaan waxa ay ahayd Garoowe – caasimadda Puntland, sannadkii 2005.

[24] http://www.ciesin.org/decentralization/English/General/Different_forms.html
[25] Local Development International, UN Joint Programme on Local Governance and Decentralized Service Delivery, Report of the Mid-Term Review, August 15, 2011, 25.
[26] PDRC, 73.

### Aasaaska Dastuuriga ah iyo Kan Sharci (Constitutional and Legal Foundation)

Dastuurka Puntland waxa uu qeexayaa in dawladdu ka kooban tahay afar heer; xukuumadda (state government), maamulka gobollada (regional administrations), goleyaasha degaanka, iyo guddiyada tuulooyinka (village committees).[27] Dastuurku waxa uu mudnaan siinayaa in maamulka la baahiyo, talada iyo go'aankana la wadaago, halka Sharciga Is-maamulka Degmooyinka No.7/2003 qeexayo habka maamul-baahinta iyo hawlaha ay u xil-saaran yihiin ee maamul iyo haqabtirka baahiyada aasaasiga ah (basic services). Dastuurka cusub ee Puntland waxa uu tilmaamayaa in maamul-baahinta tahay qaab xukun. Tusaale ahaan, Qodobka 120 waxa uu sheegayaa: "Puntland waxa ay qaadaneysaa nidaamka xukun ee maamul-baahinta, taas oo marka awoodda is-maamul lagu baahiyo dalka, Puntland ay noqoneyso gobollo iyo degmooyin". Xeerarka Dastuurka ee ku saabsan dawladaha hoose waxa ka mid ah Qodobbada 123-127 Dastuurka Puntland ee la ansixiyey April 2012.[28]

### Hawlaha Dawladda Hoose

Dastuurka Puntland iyo Sharci No. 7/2003 waxa ay siinayaan Goleyaasha Degaanka awood is-maamul, taas oo ay ku jirto awoodda ah in goluhu sameysto qorsheyaal dhaqaale, arrimaha bulshada, amniga, cashuuraha, maamulo dakhliga, baxsho adeegyo, hormuud u noqdo hawlaha horumarinta degmada, isla markaana dhaqan-gesho shuruucda. Adeegyada laga filayo dawlad hoose waxa ka mid ah ururinta qashinka adkaha ah, ifinta waddooyinka, fogeynta wasakhda biyaha (si biyuhu u fadhiisan waddooyinka) iyo, illaa xad, adeegyada waxbarashada iyo caafimaadka aasaasiga ah. Dawladda hoose waxa kale oo ay u xil-saaran tahay qorsheynta iyo maareynta arrimaha dhulka, cashuur ururinta iyo maamulka kharashka degmada.[29]

### Habka Lagu Xusho Golayaasha Degaanka

Dawladda Puntland waxa ay ka dhalatey shirweyne ballaaran oo ay ka soo qayb-galeen wakiillo ka socdey qabiillo kala duwan, oo ay ku jiraan odayaasha dhaqanka iyo hoggaamiyeyaasha siyaasadda. Hab qabiil ayaa saldhig u ahaa qaabka awood qaybsiga iyo xulashada kuraasta baarlamaanka iyo golaha wasiirrada. Maaddaama aanu jirin hab doorasho, xubnaha golaha degaanka waxa lagu doortaa saami ku dhisan qaab qabiil, hase yeeshee goleyaasha degaanka waxa lagu dooran doonaa qaab dimuqraaddi ah sida ku qeexan dastuurka cusub ee 2013.

---

27 Office of the Minister, Ministry of Interior Affairs, Local Government & Rural Development, Induction Module For Councilors And Technical Staff, June 2009, 1.

28 Puntland Constitution

29 Puntland Local Government Law No. 7

Hawshu waxa ay u dhacdaa sidan; guddi (selection committee) ay magacawdey dawladda ayaa fara odayaasha dhaqanka ee degmada in ay tirada xubnaha golaha degaanka ee loo qoondeeyey ku qaybsadaan saami ay isku waafaqsan yihiin. Guddigan, oo ku yimid dikareeto madaxweyne, waxa uu u xil saaran yahay in uu qabto liiska dadka u tartamaya (musharrixiinta) golaha degaanka, isla markaana hubiyo in dadkaasi waafaqsan yihiin shuruudaha ku xusan Sharciga Goleyaasha Degaanka (law no. 7).[30]

Marka beel walba soo xulato cidda wakiilka uga noqoneysa golaha, xubnaha xilka ayaa loo dhaarshaa, markaa ka dib ayey xubnuhu u codeeyaan jagada duqa degmada (iyo ku-xigeenka). Musharraxa ku guuleysta codka badan ayaa si rasmi ah u noqda “duqa degmada”. Sidaa oo kale ayaa loo doortaa ku-xigeenka duqa degmada. Doorashada duqa iyo ku-xigeenka waxa ay u dhacdaa gacan-taag. Marka la eego Qodobka 123 ee dastuurka, goleyaasha degaanku waxa ay xilka haynayaan 5 sano, laga billaabo marka xilka loo dhaarsho xubin walba. Muwaaddin walba ee u dhashay Puntland, gaarey da’da 25 sano jir, qaadi kara mas’uuliyad, maskax ahaan caafimaad qaba, xubin waa uu ka noqon karaa golaha degaanka.

## Su’aalaha Laga Wada Hadlayo, Hawsha iyo Filimada

### Su’aalaha Wada-hadalka

- Sidee maamul wanaaggu u eg yahay?
- Sidee ku gaari karnaa maamul wanaag?
- Waa maxay gole degaan? Gole degaan muxuu u qabtaa beesha?
- Maxay yihiin xuquuqahaaga iyo waajibaadkaaga muwaaddinnimo?
- Maxaa loola jeedaa ereyada ‘hufnaan’ iyo ‘la-xisaabtan’? Tusaaleyaal ma ka bixin kartaa?
- Faa’ido intee le’eg ayey leeyihiin fidinta awoodda/xukunka?
- Ma garaneysaa inta xubnood ee uu ka kooban yahay golaha degaanka ee degmadaada? Ma garaneysaa magaca duqa degmada?
    - Goorma ayaa la doortey? Muddo intee le’eg ayey xilka haynayaan (xubnaha golaha degaanka)?
    - Xubnaha dumar ma ku jiraan? Maxay yihiin magacyadooda?
- Maxay ka shaqeeyaan xubnaha goluhu? Ma kula tahay sidii la rabey in ay u shaqeeyaan?
- Ma idinku jiraa qof jecel in uu xubin ka noqdo golaha degaanka? Maxaad u qaban lahayd degmadaada haddii aad noqoto xubin gole degaan ama duqa

[30] PDRC, 81.

degmada?

## Hawl/Shaqo

### Qiimeynta Golaha Magaalada (City Council)

U qaybi fasalka saddex kooxood oo isugu jira wiilal iyo gabdho. Koox walba ha ka hadasho sida golaha magaaladu ugu adeego bulshada. Maxay yihiin meelaha goluhu sidii la rabey aanu uga hawl-galeyn? Tusaale ahaan, waxa dhici karta in magaaladu aanay lahayn adeeg wanaagsan ee nadaafad. Ardada weydii in ay xushaan saddexda mawduuc ee ugu mudnaanta badan. Koox walba waa in ay u hawl-gashaa sidii ay uga hadli lahayd qaabka wax looga qaban karo arrimaha (la xiriira mawduucyada la xushay). Intaa waxa dheer, ardadu waa in ay keentaa qaab ay taladooda ugu gudbiyaan golaha degaanka iyo bulshada, si wadajir wax looga qabto caqabadaha la asteeyey. Waxyaabaha u baahan in laga fekero waxa ka mid ah: kulamo wada-tashi oo dhex mara bulshada iyo golaha degaanka, in dhaqaale la ururiyo, qaabka iyo goorta hawsha la fulinayo.

### Maamul Wanaagga Dugsigaaga

Weydii ardada: “ma jeceshihiin dugsigiinna?” Weydii sida ay jeclaan lahaayeen in dugsigu u ekaado? Maxaad dugsiga u qabataa, muxuuse dugsigu kuu qabtaa?

Weydii ardada in ay liis ku qoraan waxyaabaha ay jeclaan lahaayeen in dugsiga laga qabto, ee ardayda/waalidka iyo maamulkuba aanay weli qaban.

Jawaabaha waxa ka mid noqon kara:
- Dugsigeenu ma leh dhir, ama gidaar ka cesha xoolaha
- Nadaafadda suuliyadu ma wanaagsana, biyana ma laha
- Ma lihin maktabad ama meel shaah laga cabbo
- Ma lihin urur ardey ama/iyo ururka ardeydeennu wakiil kama aha danaheenna, welina lama beddelin
- Ma lihin buugag nagu filan
- Mid ka mid ah macallimiinteenna xisaabta noo dhiga ayaa ka tegay shaqada waayo waxa u hanjabey ardey ka dib markuu imtixaanku ku adkaadey
- iwm

Weydii ardaydu in ay jeclaan lahayeen in xal loo helo dhammaan dhibaatooyinka kor ku xusan? Haddii jawaabtu HAA tahay, u sheeg ardadu ayaga laf ahaantood in ay

xallin karaan- ku dhiirri-geli in ay isu kaashadaan oo wadajir xal ku gaaraan!

Haddii aad ku guuleysato arrimahan, haddaba waad ku guuleysatey habka maamulka (wanaagsan), waxana uu la mid yahay sidan:

-Dugsiga aan ka soo qaadno in uu yahay qaranka
-Ardadu in ay tahay muwaaddiniinta
-Ururka ardadu in uu yahay dawladda
-Caqabado ayaa soo if-baxay, waxana aad dooneysaa inaad xalliso

*Tallaabooyinka hoos ku xusan waa muhiim, balse wakhti ayey qaataan, waxa ayna culeys ku noqon karaan maamulka dugsiga iyo waxbarashada – sidaa darteed waxa lagama maarmaan ah in oggolaansho laga helo maamuleyaasha dugsiyada, guddoonka waxbarashada gobolka iyo mas'uuliyiinta waxbarashada ee heer degmo.*

U sheeg ardada in ay sameeyaan 4 xisbi, isla markaana tartan doorsho u galaan ururrada ardada (student union).

Inta ayan sameyn xisbi, waa in ay mudaan u kala sameeyaan caqabadaha, isla markaana dejiyaan qorsheyaal iyo qaabab ay isku waafaqsan yihiin – waa hubaal in kooxaha kala duwan siyaabo kala duwan u arkaan – una sheeg in ay isu raacan sidaas.

U sheeg in xisbi walba diyaariyo barnaamijkiisa, soona hor dhigo ardada oo idil, isla markaana doorto hoggaamiyeyaal/musharrixiin – ayaga oo raacaya doorasho ku timaadda codka inta tirada badan.

## Sawir laga wada-hadalayo



*Golaha Odayaasha Qabiilka. Tuulada Lebi-khatumo- Degmada Rako ee gobolka Karkaar – January 29, 2011, gole odayaal ayaa ka tashanaya xal u helidda colaad dhex martey laba qabiil oo deris ah, Ali Saleban and Musse Saleban.*

1. Maxay tahay kaalinta golaha odayaasha beelaha?
2. Maxay yihiin arrimaha ay inta badan wax ka qabtaan?




*Baarlamaanka Puntland. Xubnaha Baarlamaanka Puntland waxa ay November 13, 2012, u codeynayaan shuruucda saldhigga u ah xabisidda burcad badeedda lagu qabtay Puntland, balse ay xukumeen maxkamado dalal shisheeye.*

1. Waa maxay doorka Baarlamaanka Puntland?
2. Sidee loo dhisay Baarlamaanka Puntland? Hab sidee ah ayaana la raacay markii la dhisayay?




*Shirweynaha Dastuurka Puntland. 480 ergey oo ka kala socda gobollada iyo degmooyinka Puntland ayaa shirweyne u fadhiya magaalada Garoowe 15-18 April 2012, halkaas oo looga doodadayo (loogu cod-qaadayo) dhaqan-gelinta Dastuurka Dawladda Puntland.*

1. Muxuu yahay doorka Shirweynaha Dastuurka Puntland?
2. Waxa jira qaab kale oo loogu codeeyo dastuurka; maxaa lagu magacaabaa?



*Calanka Puntland. Baarlamaanka Puntland waxa uu 22kii December 2009 ansixiyey in calankan cusub noqdo astaanta dawladda Puntland.*

1. Maxay yihiin astaamaha rasmiga ah ee dawlad yeelan karto? (Calan, Astaan, Hees)
2. Waa maxay sababta Puntland u leedahay calan u gaar ah?
3. Midabbada ku yaal calanka Puntland maxay u taagan yihiin? (Bluugga iyo xiddigtu waa midnimo qaran, caddaanku waa nabad iyo cagaarka ooo barwaaqo u taagan)



*Wadahadal kooxeed degmada - Bander Bayla 2010 (goobtu waa xafiiska dawladda hoose ee degmada). Sawirka waxa ka muuqda wakiillo ka kala tirsan dhammaan qaybaha kala duwan ee bulshada oo ka wada qayb-qaadanaya hawlaha maamulka dawladda hoose (qorsheyn iyo go'aan gaaris).*

1. Ma ka qayb-gashaa go'aannada degmadaada? Haddii jawaabtu tahay haa, sidee uga qayb gashaa?
2. Golaha degaanku ma abaabulaa kulanno ay dadku talada wax ku darsadaan, isla markaana xog ku qaataan?



*Doorashada Golaha Degaanka Degmada Garoowe 2005 (Wakhtiga hadda ah, xubnaha golaha degaanka waxa lagu doortaa hab qabiil. Hase yeeshee, sida ku xusan dastuurka cusub ee 2013, goleyaasha degaanka waxa lagu soo dooranayaa hab dimuqraaddi ah).*

1. Habkee baa wanaagsan in golaha degaanka lagu dhiso; qaabka qabiilka ah ee hadda jira mase doorashooyin xor ah oo dimuqraaddi ah? Waa maxay sababtu?
2. Haddii aad noqoto xubin gole degaan, yaad mateleysaa (qabiilkaaga, xisbi, dhammaan dadka ku nool degmada)

**Shaqada: Doodda ku saabsan Maah-maahaha iyo Gabayga la xiriira nabadda**

| No: | | |
|---|---|---|
| 1 | Erayga alifka ka qalloocdaa AL BAQRA kuma tooso. | If you make an error in the first letter of a word, it will not become better by the last letter. (A minor mistake in the beginning can lead to a serious setback in the end). |
| 2 | Oodo dhacameed, siday u kala sareeyaan baa loo kala guraa. | As the branches of a fence are piled up, so they should be taken down. (First things first; one thing at a time). |
| 3 | Wadiiqada yar, Waddada weyn ayey kugu riddaa. | The small path will take you to the big road. |
| 4 | Hadaan la kala roonaan Roob ma da'o. | Unless one of the debaters gives in it will not rain (i.e. Nothing good comes without sympathy for one another). |
| 5 | Nin lagu seexdow ha seexan. | The man who is responsible for the sleep of others should not sleep. (Those who protect others have a responsibility to be fully alert). |
| 6 | Doonni laba naakhuude way jabtaa. | A boat with two steersmen sinks. |
| 7 | Taladaan la ruugin waa lagu rafaadaa. | An unconsidered decision will make you suffer. (A problem that is not well analyzed leads to failure). |
| 8 | Ama waa la muuqdaa, Ama waa la maqnaadaa. | Either be useful or be absent from the scene. (Don't sit on your hands, and make your voice heard). |
| 9 | Awrba awrka ka horeeyuu saanqaadkiisa leeyahay. | A camel (in a caravan) follows the tracks of the leading camel.<br><br>*Is it always good to follow your leaders? What if the leader is taking you in the wrong direction?* |

| | | |
|---|---|---|
| 10 | "Meel "'hoo' u baahan hadal wax kama taro" | Talk will not satisfy one who has a need for a hand/support<br><br>*Do you agree with this statement? Does it fit all the time? Is it right all the time?*<br>*Is this applicable when you are making decisive determinations; when choosing whom you want to be your representatives what demands would you base your decisions to vote or vote against him/her?*<br><br>*Is there a time when giving advice is much better than feeding someone?*<br><br>*Do you think that peace, prosperity, tranquility, status and prominence are all Allah-given? Or is it a matter of causes and impact, actions vs reactions?* |
| 11 | Intaadan falin ka fiirso. | Think before you do something. (Look before you leap…) |
| 12 | Ma tashiishe waa ka mid kuwa rag ugu liita. | He who is wasteful is among the lowest of men. |

**Su'aalaha guud ee maah-maahaha**

*Maxay maahmaahdu ka hadleysaa? Side ayaad u sharrixi lahayd macneheeda dhabta ah? Maxay inoo sheegeysaa?*

*Maxay ayaa la adeegsada yaase adeegsada (yaase loo adeegsadaa)? Keen tusaale.*

*Af-Somaliga maxa lagu yiraahdaa oraahda noocan ah? Maxaad u malayneysaa adigu in aan badan loo oran sida loola jeedo?*

*Goorma ayey ku habboon tahay in la adeegsado? Maxay ku baaqeysaa?*

*Ma is waafaqaan farriinta ay xambaarto iyo jawaab-celinta laga bixio? Haddii ay jawaabtu tahay maya, waayo, …..maxaase ku xiga? Side ayuu ka yeelaa qofka loo soo jawaabey?*

*Adigu sided u aragtaa? Wakhti kasta ma ku habboon tahay? Mar kasta ma saxbaa?*

**Sinnaanta iyo Dimuqraaddiyadda**

*(Equality and Democracy)*

*(Poet: Saahid Qammaan Bulxan 1920,*

*Qabridaharre, Ethiopian Somali Region)*

**Rag waxaan ku maamuli aqaan ama ku maamuusi**

**Masa inaannu nahay oo tashigu meerto noo yahaye**

**Massallaha ninkaan ii dhigayn kayga uma meersho**

**Ninkii aniga iga maarmi kara, uma muraad yeesho**

*I can only rule or respect men, When we're equal and alike, He who doesn't recognize my status, I deny his, He who disregards me, I simply ignore him.*

**Faa'idada Midnimada**

*(The Importance of Unity)*

*(Poet: Salaan Carrabey, 1945, Burao)*

**Nafta lama xaqiro Eebbahay xay ka soo dhigaye**

**Qudhaanjaba Xakiimka Alle yaa ku xusay aayade**
**Taageeraday laba gacmood tamar ku yeeshaane**

**Waxay midig tis qaadda hadday tirisaa bidixe**
**Tis waxaa la qaadaa markay tirisaa bidixe,**

**Hadday midig tis keli taagan tahay, tahar ma goyseene**

*Never disgrace anybody/soul that Allah endowed freedom; Allah's Quranic Verses even cite ants to prove its worthiness; Two are stronger when they support each other; The right hand cannot lift a bundle of shrubs when the left doesn't support*

**Midnimada**

*(Unity)*

*(Poet: Haji Adan Ahmed – Afqalooc, 1947, Erigavo)*

**Ilko wadajirkooday**

**Hilbaha adag ku gooyaane,**

**Hadday midiba meel taagan tahay, adhax ma feentaane**

*Teeth can cut hard meat more strongly when together; But if they do not support each other they cannot peel a tendon from the spine*

**Caddaaladda**

*(Justice)*

*(Poet: Ali-Dhuuh, 1917, Buuhoodle, Hawd)*

**Rag caddaalad waaya sidii cawsha kala yaac**

*Men deprived from justice become as game in the bush*

**Maamul-wanaagga**

*(Good Governance)*

*(Poet: Haji Adan Ahmed- Afqalooc, 1966, Erigavo)*

**Tusmaa uunku kala leeyahee, teennanaa simane**
**Tartanka iyo garab-yaacu waa tu aan bannaanayne**

*Other nations embrace systems to rule, but we are unruly*
*Antagonism and confusion shall not be allowed*

## Filimada

### Dimuqraaddiyadda Puntland (Planting Democracy in Puntland) - 2012

**Faallo:** Waa filim ku saabsan wacyi-gelinta geeddi-socodka dimuqraaddiyeynta nidaamka siyaasadeed ee Puntland. Hawshaas oo si wadajir ah ay gobollada Mudug iyo Nugaal uga qabteen Guddiga Doorashooyinka Ku-meel-gaarka ah ee Puntland iyo Qaybta Maqal-Muuqaalka Guur-guurta ee PDRC (MAVU).

Waxay ay ahayd markii ugu horreysay ee mawduuc noocan oo kale ah la gaarsiiyo heer gobol, degmo iyo tuulo. Waxa ay ahayd markii ugu horreysay ee reer Punland ay maqlaan diiwaan-gelinta ururrada siyaasadda, asteynta goobaha doorashada, iyo xorriyadda ay ururradu ku dooranayaan cidda metaleysa.

Filimkan waxa uu diiradda saarayaa ololaha wacyi-gelinta, dadka ka qayb-galay, goobaha la booqday, iyo ra'yiga beeluhu ka qabaan geeddi-socodka.

**Su'alaaha la socda:**

- Maxaad ka baratay filimkan?
- Dadka wax la su'aaley side bey uga jawaabeen? Maxaa la isku waafaqay?
- Maxaad u maleyneysaa in hab dimuqraaddi ah waxtar ugu leeyahay waddankaaga/dadkaaga?
- Sidee dimuqraaddiyaddu u saameysaa noloshaada, si toos ah ama si dadban?
- Heer intee le'eg ayuu muwaaddin adiga oo kale ah saameyn ku yeelan karaa hab-dawladeedka ku dhisan qabiilka, maxaase isbeddelaya haddii la dhaqan-gesho habka axsaabta badan?
- Qofkiin ma akhriyey dastuurka? Maxay yihiin xuquuqaha aasaasiga ah ee dastuurku siinayo muwaaddinka?

### Aasaaskii Dawladda Puntland (Establishment of Puntland State – 2008)

**Faallo:** Waa filim taariikh ah, kuna saabsan dhismihii dawladda Puntland 1998-ddii. Filimku waxa uu ka faalloonayaa, 8 sano oo dawlad la'aan ah dabadeed, sida ay beelaha Puntland u go'aansadeen in ay yeeshaan maamul mideysan, wakhtigaas oo aanay jirin kaabayaal dhaqaale, dalkuna ku jirey burbur.

**Su'alaaha la socda:**

- Maxa looga baahday in Puntland la asaaso? Yaa asaasay?
- Maxaynu u samaysanay dastuurka cusub? Muxu ahaa dastuurkii uu beddeley? Goorma ayaa la ansixiyey?

**U qaybi fasalka 4 ilaa 5 kooxood. Waxaad koox walba u xilsaartaa in labo ilaa saddex bog ka qoraan itijaaha siyaasadded oo Puntland oo ay ku jiraan:**
Divide the class into 4 to 5 groups. Give the assignment to prepare a maximum of two pages about Puntland political trends including:

- Muxu ahaa qaab-dhismeedka siyaasadeed oo ka horayey intii aan la dhisin Puntland?
- Maxaa looga baahday in Puntland la asaaso?
- Halkee, goorma iyo sidee?

- Maxay ahayd ujeeddada loo asaasay?
- Madaxweynihii u horrayey muxu ahaa magaciisu?
- Maxa isbeddel ah oo ku dhacay?
- Horumarka la gaarey iyo dib-u-dhicii ku yimid.

**Dastuurka Puntland (Puntland Constitution) - April 2012**

**Faallo:** Filimkan waxa uu ku saabsan yahay geedi-socodkii dejinta dastuurka Puntland; laga billaabo 1998 markii la dhisay dawladda Puntland illaa iyo "Shir-weynihii Aftida Dastuurka" halkaas oo in ka badan 480 ergey oo ka kala socdey degaamada Puntland oo idil ay u codeysay dastuurka. Filimku waxa kale oo uu ka hadlayaa geeddi-socodka dimuqraaddiyadda ee ka socda Puntland, habka axsaabta badan ee laga hirgelinayo Puntland, doorashooyinka guud ee qorsheysan in ay ka dhacaan Puntland, iyo weliba kaalinta iyo hawlaha Guddiga Ku-meel-gaarka ah ee Doorashooyinka Puntland (GKMDP-TPEC).

**Su'alaaha la socda:**

Ardayda u dir in ay ka soo shaqayaan, labo ilaa saddex bog sida nidaamka dimuqraadiga ahi uga duwan yahay nidaamka qabiilka, iyaga oo tixgelinaya arrimaha:

- Waa maxay laamaha dawladdu? Shaqadooduse maxay tahay?
- Muxu isbeddel ah oo la imanaya in la isku maamulo habka dimuqraadigaadiga oo ka duulaya tixgelinna siinaya arrimaha:
    a. Nabadda iyo Amniga
    b. Soiyaasad ahaan
    c. Dhaqaale ahaan
    d. Xorriyadaha
    e. Kaqaybqaadashada siyaasadeed
    f. Ka qaybgalka
    g. Adeegga bulsho
    h. Horumarka

**Filimka Tallaabo-Tallaabo**

**Qeexid:** Filimkani waxaa laga sameeyay guulaha ay gaadhay Wasaaradda Waxbarashada Puntland ee ku aadan middaynta manhajka waxbarashada iyo sida wasaaraddu ugu guulaysatay in ay deeqo-waxbarasho dawaldaha dariska ah uga hesho ardayda darajada sare keenay. Filimku wuxuu iftiiminayaa faa'iidada waxbarashada iyo ardaydii ku guulaystay deeqaha-waxbarasho oo u ambabaxayaa jaamacadaha dibada ee ay ka heleen deeqaha waxbarasho.

**Su'aalo:**

- Maxaad ka baratay filimkan? Haddii ay jiraan qeybo ka tirsan filimka oo si gaar ah usoo jiitay dareenka ardayda, u ogoloow in arday/qeyb ka tirsan ardayda ay soo horjoogsadaan fasalka kadibna ay la wadaagaan dareenkooda.
- Sidee ayay ku saameeyeen adiga, qoyska, asxaabtaada iyo bulshada aad ka tirsan tahay tallaabooyinka horumarka leh ee loo qaaday dhanka middaynta manhajka iyo imtixaanada, iyo deeqaha-waxbarasho ee lagu saleeyay darajada ardayda?
- Filimku muxuu ku kordhiyay aqoontaada, wacyigaaga, aragtidaada iyo qorshahaaga mustaqbalka?

**Filimka Waxbarashada Madaniga ah**

Filimkani wuxuu soo bandhigayaa tartan dhanka suugaanta ah oo dhexmaray 5 dugsi sare oo ka jira Puntland. Ardayda dhigata dugsiyadaasi ayaa ku tartamaya suugaan ku saabsan dimuqraadiyada, xorriyada, waxbarashada madaniga ah, ka-qeybgalka siyaasadda, waxbarashada, xuquuqda aadanaha iyo arrimo kale oo muhiim ah.

**Su'aalaha filmka:**

- Maxay tahay fariinta muhiimka ah ee uu filimkani gudbinayo? Qeybtee ayaad ugu jeceshahay ama kusoo jiidatay guud ahaan filimka?
- Ma jiraa qof ka mid ah fasalka oo ka qeyb qaatay tartan suugaaneedkan? Haddii jawaabtu "haa" tahay, waydii ardayga suugaanta uu soo bandhigay mida ay ahayd iyo waxa ay ku saabsanayd? Haddii jawaabtu "maya" tahay, waydii ardayda haddii ay horay isugu dayeen in ay curiyaan suugaantan oo kale.

**Accompanying questions/activity:**

- What is the core message that this film conveys? Which part(s) of the show did you like most?
- Do any of the students in the class participate in this poetry contest? If yes, which poem was yours and what was it about? If NO, ask if anyone in the class has composed relevant poems in the past.

**Hawl U Gaar ah Arday Walba:** Arday walba ha isku dayo in uu curiyo Buraan-bur/ Gabay/Maanso/Geeraar IWM. Bare ka caawi ardayda qaafiyada, dhererka tibxaha, waxyaalaha reeban in lagu xad-gudbo(diinta, heybta iyo dhaqanka) kuna hag in suugaantooda ay ku salaysnaato nabadda, waxbarashada, dimuqraadiyadda, aqoonta madaniga ah, hogaaminta dhaqanka, midnimada iyo dawlad wanaaga. Guddi khuburo dhaqanka ah ama koox barayaal ahi ha kala saareen suugaanta ardayda hana kala mudnaansiiyeen si loo ogaado suugaanta murtida leh iyo tan aan lahayn.

## Lifaaq 1: Qorshaynta Kulanka: Waxyaabaha loo baahan yahay in la tixgeliyo si kulanka loo qorshayo

**Arrimaha loo bahan yahay in Qorshaha lagu Tixgeliyo**

**Maxay tahay ujeeddada hawshu?**

- Ku soo dabbaalid iyo ka to involve and engage
- Faaqidaadda arrimaha iyo curinta fikrado
- Is xiriirin iyo isla wadaagidda fikrado iyo khibrao
- Is wargelin
- I.W.M

**Maxaa laga filaya in ay ka soo baxaan?**

- Ku heshiinta ujeedo iyo itijaah, go'aamo
- Astaynta arrimo, faa'iidada ku jirta ama dib-u-dhac ka iman kara.
- Sahminta fikrado cusub iyo sida loo wajahayo
- hagaajinta xiriirada shakhsiga ama kan isla shaqayn.
- Taageeridda hal-abuurka
- I.W.M

**Maxay yihiin awooda wax-qabad oo ay leeyihiih kaqaybgalayaashu marka laga eego**

- Waayo-aragnimo ama khibrad
- Kala duwanaanshaha sooyaalkooda diversity of background
- Xiriirkooda relationships between participants
- Ku kala duwanaanshohooda sida ay u rabaan in ay wax u kororsadaan, ama dhanka ay ka arkaan
- I.W.M

**Maxay tahay war-celinta iyo xogta looga baahan yahay si qiimayn loo samayo?**

- Aragtida shakhsiahaaneed ee fududayaha ee kulanka
- Wadahadalka la-fududayaha iyo kaqaybgalayaasha
- War-celinta kaqaybgalayaasha marka uu shirku xirmo ama dhammaado
- Maxaa ka soo baxay
- I.W.M

**Waa maxay wax-ku-biirinta looga baahan yahay?**

- Xogta hawsha ama geedi-socodka
- Sooyaalka xogta oo ku saabsan mawduuca
- Xogta udub-dhexaadka u ah fariimihii uu filimku sidey, sawirku muujiyey ama qoraalku xusay
- Su'aalaha iyo arrimaha loo bahan yahay in la tixgeliyo

**Naqshadaynta**

- Mabaadii'da asaasiga ah
- Habka Ka-wada-qaybgalka ama Hab kale
- wakhtiga, Goobta, khayraadka iyo awoodaha wax qabad oo la haysto

## Sample Completed Session Plan – all timings are approximate

| Wakh tiga | Hawsha | Sida | Qalabka/ Aaladaha | Xusuus-qor |
|---|---|---|---|---|
| 10.00 (15 min) | ***Soo dhowaynta***, Is-baridda fududayaha; ujeedada kulanka<br><br>Is-barasha guud (wareeg) | Kooxda oo dhan | Waraaqaha la qaybinayo – agendaha iyo hawlaha maalinta oo si kooban loo soo jeediyo<br><br>Ku wareeg giraanta | Habka loo goglayo qolka: hab giraan ama kooxo sida makhaayadaha/ baaraka loo fariisiyo<br><br>ilwaadi cidda goobta ku sugan |
| 10.15 (5 min) | Xeerka kulanka/ xorroyadaha | Kooxda oo dhan | Xeerka kulanka/ xorriyada iyo agendada in meel lagu qoro | Waxay cid walba ka saacidaa in in ay aragto oo ku dhaqanto – waa xasuusin |
| 10.20 (15 min) | Arrimaha shakhsiga ah– dooro sawir oo markaas ku wareeji madasha, kooxda inteeda kalena kala wadaag waxa aad u xulatay iyo macnaha uu kuu leeyahay<br><br>Derbiga sur oo cinwaan u samay<br><br>Yaa wax ka oranaya/sheegaya? | Xubnaha Kooxdu Ha wareejiyeen<br><br>Kooxda oo dhammi | Ha kala Xusheen Muuqaallada hana ku qoreen warqad yar ama oo derbiga lagu dhejiyo | Waxay ka caawineysaa xubnaha kooxda in ay dhaqdhaqaaqaan oo isla-fal-galaan.<br><br>Si siman oo xiriirsan marka loogu dhejiyo waxay waxay abuuraysaaxaalad raali gelineysaa oo la wadaago<br><br>Lama falanqaynayo ilaa looga baahdo |

| | | | | |
|---|---|---|---|---|
| 10.35 (45 min) | **Daawashada Flim-ka**<br><br>Wixii su'aalo iyo faallo hor-dhac ah? | Kooxda oo dhan | Brojector, Computer, Aflaam<br><br>Warqado wax lagu qorto iyo su'aalo | Waxay u fududayneysaa in ay ka qaybgalayaashu wax qortaan – waxa laga yaaba in badankood aaney rabin in ay wax qortaan. |
| 11.15 (15 min) | **Nasasho/Shaah** | | | |
| 11.30 (45 min) | Wadahadalka<br>• Wakhtiga shakhsiga ah: waxaad ku dadaashaa in lagu koobnaado film-ka iyo nuxurkiisa<br>• Ciyaaro ay Kooxdu samayso<br>• Waxa lagu wadaagaya fikri — In la xaqiijiyo in cid waliba codkeeda dhiibato; Ka codso in qof ka mid ah kooxdu qodobada muhiimka ah idiin qaado<br>• La socodsii kooxda wixii ka soo kordha oo laga doodi karo mustaqbalka | Qof-qof<br><br>Kooxo 4-5 midkiiba ka kooban tahay<br><br>Kooxda oo dhan | Sawirro waa la adeegsan karaa<br><br>Warqadaha waaweyn ama saburad waa isticmaali kara kuwaas oo<br><br>Cinwaannada lagu qorto | Waxay u sahleysaa in qof kasta gaarkiisa u fekero isagoon cidina saamayn ku yeelan<br><br>Ciyyaruhu waxay fududayaan is-dhexgalka ardayda iyo in ay si wadajir ah u shaqayaan.<br><br>Kooha yar-yar oo koobani waxay ku fiican yihiin in mid kasta k aka mid ahi helo fursad uu ku hadlo inta kalena dhegaysato. Waxay kale oo keenta in aan mid ka mid ahi aanu afduubin doodad ama wadahadalka.<br><br>Fududayuhu wuxu qaadanayaa "notes" iyo kala maaraynta su'aalaha kuwaba sida iyo goorta laga jawaabayo ama laga doodayo. |

| | | | | |
|---|---|---|---|---|
| 12.15 (15 min) | Qiimaynta iyo war-celinta<br><br>Wareeg kamadambays ah oo ardayda/ kaqaybgalayaasha loo jeediyo iyo foomaka oo laga buuxsho:<br><br>Maantay waxaan halkan ka…… | Qof-qof | Foomka qiimaynta iyo su'aalo | Wareeg kamadambays ah oo kooxda dhan lagu kulmiyo |
| 12.30 | **Mahadnaq iyo xuritaan** | | | |

Tusaale: wakhtiga kor ka muuqdaa waa male…

## Lifaaq 2: Tusaalaha foomka xog-ururinta inta aan kulanka la furin

Waa muhiim in ka qaybgalayaasha laga ururiyo xog bal waxa ay ka filayaan kulanka. Taasi waxay kuu sahleysaa in aad ku feejignaatid baahiyaha gaar-gaarka ah eek a qaybgalayaasha iyo fursado aad ku ogaatid dareenkooda iyo baahiyohooda. Waxay kale oo kuu sahleysa in aad si nidaamsan u qorshaysid kulanka oo aad ku hagtid in uu mirodhal noqdo. (wixi xog ah ee aad u aragtid in ay muhiim yihiin ku dar oo ha ka tegin).

Dhammaan warcelinta aad ka soo ururisid ardaydu waa in ay sir kuu ahaadaan oo aad keliga daalacataa.

**Fadlan ku soo war-celi inta ka horraysa….**

**Magac**.......................................................................................................................

1. **Maxaad ka filaysaa wadahadalkan aynu qorshayneyno in aynu qabano…..**

2. **Maxaad jeclaan lahayd in uu ka soo baxo kulanka?**

3. **Waxa su'aalo ah ama dareen ma qabtaa kulanka wadahadalka?**

4. **Maxay kale…..?**

## Lifaaq 3: Baraarujinta

Ugu qor kaqaybgalayaasha shaxdan hadba sida ay ugu habboon tahay. Waa in uu macne u sameeyo waxa ay ku beretamayaan. Waxaad kale oo ku dartaa waxyaabo aan suurto gal ahayn si ay ugu mashquulaan ka dibna uga soocaan waxa caqligalka ah. mid kasta oo iyaga ka mid ah sii warqad weeyn oo uu ku buuxsado shaxdiisa. Qof kasta waa inuu shaxda ka helo wax ka duwan kan kale balse shuruudaha bogcad kasta oo shaxda ku jirta buuxinaya. Cidda hor dhammaysa ayaa ayaa guulaysaneysa.

**Bingo**

Soo hel qofka leh….. (waa in bogcad kasta ee shaxda laga helo magac ka duwan kuwa kale..)

| | | |
|---|---|---|
| Wuxu tuma musik | Waxbuu sawiri kara | Wuxu tegey talyaaiga |
| Shan sano ayuu koofiyaddan watey | Wuxu cunaa khdaarta oo keliya (vegetarian) | Shimbiraha ayuu jecel yahay |
| Wuxu yaqaan dad can ah | Balwad xun ayuu leeyahay | Wuu dabaashaa ama wuu ordaa<br>Swims or runs regularly |
| Wuxu beertaa khudaar | Kallarka bluugga ah ayuu jecel yahay | Wuu Fooryi dheer yahay |
| Wuxu ku hadla saddex luqadood | Bisad ayuu lee yahay | Wuxu jecel yahay in uu cuno cuntada basbaaska leh |

## Lifaaq 4: In luqadda canaanta dusha looga tuuro

Luqadda waxa la eedayaa ama la canaataa marka:

- Ay soo baxdo in qofka kale uu gebi ahaanba qaldan yahay
- La qoonsado sida qofka kale u fekerayo ama sida dareenkiisu yahay
- Ay u muuqato in qofka kale weligiis dhibaato doon yahay ama wax xun maleego

Figsii weedhan haddii aad u aragtid in ay canaan tahay

1. Waan ka diiqadooda/xumaadaa marka uu qayliyo
2. Xassan wuxu rabey in uu i dakhro oo i dhaawoco markuu dhagaxa igu soo tuurayey
3. Marian iyo Ayaan meel kasta oo ay tagaan dhib ayeey wadaan
4. Waxaan u malaynayaa in aad ka mid kuwii dooddaas ku jirey
5. Waad ogtahay wixii dhici lahaa haddaad macallinka sidaas ula hadli lahayd.
6. Had iyo jeer walaalkay waanu isku xanaaqna.
7. Waxaad taha qofka dunida ugu doqonsan.
8. Ma waxaad moodeysaa in aad wax walba ii sheegi kartid, sababta oo ah in aad iga weyn tahay oo keliya.
9. Waxaan jeclaan lahaa in aad inta ka feejignaan lahayd.
10. Mar kasta oo aad damacadid in aad wax fasirtidba waad is dhex yaacdaa.
11. Dhbaatadu waa Maryan oo had iyo jeer jecel in Cali ka guulaysto.
12. Dadka ajnebiga ah lama aamini karo.
13. Waa carooda marka aan la kulmo dad waddamo kale ka yimid.
14. Waan isku khajaley markii aan siibtey.
15. Walaashay weey ku faraxsanayd markii aan kufay.
16. Adigu cid kale kama fekertid adiga ma ahee.
17. Waxaan u malaynayaa Hooda waa nooc....
18. Runtii gabadhaasi weey i caawisay oo buugtii iga daadatay ayey ii soo ururisay, hase ahaate waxaan ogahay in ay hoosta ka qosleysey.
19. Jama ayaa si xun ula hadlay Marayan markaas ayey ooydey.
20. Cid walida waa ogtahay in ay xan badan tahay oo cid walba dhibaatayso.

## Lifaaq 5: Foomka Qiimaynta

Foomka qiimaynta kulanka – ka jawaab arrimaha hoos ku qoran. Fadlan ku qor dhammaan wixi aad ka kororsatay kulanka ama waxaad ka fileysey oo aad ka hesashay am aka kaa baaqsaday.

Isku day in aad xustid wax kasta oo aad qabtid in ay tahay muhiim in lagu daro ama aad ka cabanesid ama walaac ka qabtid.

War-celintaadu waxay aad wax uga tareysaa hagaajinta kulamada soo socda/ dambe.

Magacaaga (waa khiyaari) ........................................................................................

1. Maantay waxaan dareemayaa in aan ...............................................................
...........................................................................................................................
...........................................................................................................................
...........................................................................................................................
...........................................................................................................................
...........................................................................................................................

2. Waxaan soo jeedin laha ..........................................................................
...........................................................................................................................
...........................................................................................................................
...........................................................................................................................
...........................................................................................................................
...........................................................................................................................

3. Arrimaha, walaaca, su'aalaha
...........................................................................................................................
...........................................................................................................................
...........................................................................................................................
...........................................................................................................................
...........................................................................................................................

4. Maxaa kale?
...........................................................................................................................
...........................................................................................................................

Fadlan miiska saar marka aad dhammaysid ama fududayaha gacanta ka geli. Aad iyo aad ayaad ugu mahadsan tahay wax-ku-biirintaada wax-ku-oolka ah.

## Lifaaq 6: Liiska macallimiintii ka qaybgashaya Shikii wada-yashi iyo ansixinta buugga

| No. | Name | Title | District | School |
|---|---|---|---|---|
| 1 | Bashir Ahmed Khalaf | REO | Galkaio | REO Mudug |
| 2 | Isak Mohamed Ali | Teacher | Galkaio | Omar Samatar |
| 3 | Muctar Ismael Hassan | Teacher | Galkaio | Omar Samatar |
| 4 | Mohamed Ahmed Mohamed | Teacher | Galkaio | Yasin Nur |
| 5 | Abdullahi Ali Hersi | H/teacher | Galkaio | Yasin Nur |
| 6 | Abdikadir Ali Da'ar | Teacher | Galkaio | Omar Samatar |
| 7 | Nur Hussien Mohamed | Teacher | Gardo | Mumtada |
| 8 | Said Ahmed Farah | H/teacher | Gardo | Sh. Osman |
| 9 | Osman Abdi Haji | Teacher | Gardo | Sh. Osman |
| 10 | Abdikarim Hussien Abdi | Teacher | Gardo | Sh. Osman |
| 11 | Abdirahman Adam Hussien | H/teacher | Gardo | Nawawi |
| 12 | Owais Mohamed Harago | Teacher | Gardo | Mumtada |
| 13 | Mohamed M. Warsame | Teacher | Bosaso | White Tower |
| 14 | Sayid Ali Ibrahim Hussein | Teacher | Bosaso | Najah |
| 15 | Abdi Biriq Nur | Teacher | Bosaso | Garisa |
| 16 | Ruun Abdi Nur | Teacher | Bosaso | Shafici Schoo |
| 17 | Ahmed Ismael Elmi | Teacher | Eyl | Ayl School |
| 18 | Mohamed Haji Muse | Teacher | Eyl | Ayl School |
| 19 | Abdifatah Ahmed Abdillahi | Teacher | Burtinle | Burntile School |
| 20 | Mustafe Mohamed Ahmed | Teacher | Dangoroyo | Tageer School |
| 21 | Hassan Abdullahi Elmi | REO | Garowe | REO Nugal |
| 22 | Abdalle Salim Ahmed | H/teacher | Garowe | Nugal Secondary |
| 23 | Abdullahi Yusuf Muse | Teacher | Garowe | Nawawi Garowe |
| 24 | Maxamed Muse Farah | Formal Ed. Head | Garowe | MOE |
| 25 | Ahmed Isse Abdirahman | Head Master | Garowe | Alwaha School |
| 26 | Mowlid Mohamed Nur | Teacher | Garowe | Nugal Secondary |
| 27 | Abdiwali Yusuf Ali | Teacher | Garowe | Gambol |
| 28 | Omar Adan Yusuf | H/teacher | Garowe | Alwaha School |
| 29 | Mahad Ahmed Omar | Teacher | Garowe | Gambol |
| 30 | Abdi Dahir Abshir | H/teacher | Garowe | Nawawi Garowe |

## Lifaaq 7: Akhris Dheeraad ah

Haddii aad u baahatid in aad faahfaahin dheeraad ah heshid, fadlan ka daalaco xiriirrada (links) hoos ku qoran.

### On Facilitation

Roger Schwarz (2005) The Skilled Facilitator Approach in *The IAF Handbook of Group Facilitation*, Sandy Schuman (ed), Chapter 2, pgs 21-34.
(http://rogerschwarzassociates.poweredbyeden.com/files/106/8403.pdf)

*The Role of the Teacher in Small Groups  Faculty Development*, London Deanery
(http://www.faculty.londondeanery.ac.uk/e-learning/small-group-teaching/the-role-of-the-teacher)

### On Groups

*Groupwork,* The encyclopedia of informal edu cation
(http://www.infed.org/groupwork/what_is_groupwork.htm#what_is_a_group)

### On Dialogue

P. Freire and I. Shor (1987) *A Pedagogy for Liberation. Dialogues on Transforming Education*, London: Macmillan.

*The Power of Dialogue*, Scott London 2012 (http://www.scottlondon.com/articles/ondialogue.html)

Michael Mendizza (1994) David Bohm's *Theory of Dialogue  Touch the Future* (http://ttfuture.org/files/2/pdf/mm_dialogue_agenda.pdf)

Involve (2008) *Deliberative Public Engagement: Nine Principles*, published by the National Consumer Council (UK) (http://www.involve.org.uk/wp-content/uploads/2011/03/Deliberative-public-engagement-nine-principles.pdf)

*Dialogue, Critical and Creative Thinking Program* (http://cct.wikispaces.umb.edu/Dialogue)

### On the Use of Games

*Games and Activities Resource Bank Peace Education*
http://escolapau.uab.cat/index.php?option=com_content&view=article&id=187&Itemid=93&lang=en

Very useful online resource provided by The School for a Culture of Peace (escola de cultura de pau, Barcelona), providing background information, underpinning rationale, and games for use in peace education.

Curtiss Murphy, *Why Games Work and the Science of Learning* (http://www.goodgamesbydesign.com/Files/WhyGamesWork_TheScienceOfLearning_CMurphy_2011.pdf) (On the power of games and laughter)

*ECYC Games Book* (http://www.ecyc.org/sites/default/files/ecyc_game_book.pdf), The European Confederation of Youth Clubs has produced a compilation of icebreakers, energizers and teambuilding games used in youth clubs from all over Europe. It gives game instructions and tips on how, when and with whom to use these games.

**On Gender**

http://www.unesco.org/new/en/unesco/themes/gender-equality/capacity-development/gender-mainstreaming-tools/

**On Democracy**

Elections/Instituting Democracy (http://www.colorado.edu/conflict/peace/treatment/elect.htm)

African elections database, elections in Somalia (http://africanelections.tripod.com/so.html)

Puntland Constitution (contact PDRC for copies)

**On Islam and Peace**

*The Holy Qur-an*, pp 24, Abdullahi Yusuf Ali, Lahore, Pakistan, 1934;

Fomba V. Sannoh, *Human Right and Human Dignity in Islam* (http://fomba88.tripod.com/mypersonalsite/id18.html)